# SIYAASADDA QUUDINTA DUGSIYADA EE QARANKA, 2025

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare

Muqdisho

August, 2025

## GOGOLDHIG

Barnaamijka Quudinta Dugsiyadu waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah istiraatijiyada Wasaaradda ee lagu baahinayo helitaanka waxbarashada aasaasiga ah. Qaramada Midoobay iyo Midowga Afrika waxay si rasmi ah u aqoonsadeen in ay barnaamijyada quudinta dugsiyadu yihiin habab waxku'ool ah oo lagu xaqiijin karo qaybo badan oo ka mid ah Yoolalka Horumarka Waara (YHW), sida  Ciribtirka Gaajada (YHW2), bixinta waxbarasho tayo leh oo loo siman yahay (YHW 4) iyo sidoo kale Yoolasha Horumarka Waara ee tirsigoodu yahay: 1, 3, 5, 8 iyo 10.

Tan iyo sannadkii 2003, Barnaamijka Quudinta Dugsiyada waxaa laga hirgelinayey qeybo kamid ah Dugsiyada Hoose iyo Dhexe ee dalka, waxaana iska kaashanayay Do3wladda Federaalka Soomaaliya iyo Hay'adda Cuntada Adduunka. Barnaamijkani waxa uu si gaar ah u daboolaa gaajada carruurta dhigata dugsiyada hoose iyo dhexe ee dadweynaha. Barnaamijka Quudinta dugsiyadu, sidoo kale waa xeelad waxku'ool ah oo loogu talaggalay in kor loogu qaado isdiiwaangelinta ardayda, joogtaynta waxbarashada, iyo miro-dhalka guud ee tacliinta. Barnaamijku wuxuu bixinayaa fursad lagu sameeyo dakhli, shaqo-abuur, iyo faa'iidooyin dhaqaale oo ay ka dhaxlaan bulshada degaanku.

Wasaaradda waxbarashadu waxay juhdi xoog leh gelinaysaa naqshadaynta, horumarinta, iyo hirgelinta barnaamij qaran oo cunto bilaash ah lagu siinayo ardayda dugsiyada ee  guud ahaan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Haddaba, Barnaamijka Quudinta Dugsiyadu si uu u noqdo mid hufan oo taabbagal ah, wuxuu u baahan yahay iskaashi dhinacyo badan leh oo ay hor boodayso Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) isla jeerkaasna ay si heer qaran, heer gobol ilaa heer degmo ah u abaabusho.  Tani waxay ka dhigan tahay in baahi loo qabo habraacyo waaweyn oo lagu maareeyo isbeddellada iyo karaan-dhis laga sameeyo gudaha hay'adaha saamilayda ah iyo hawlwadeennada ku lugta leh barnaamijkan. Qaar ka mid ah caqabadaha u baahan in wax laga qabto waxaa ka mid ah: abuuridda sumcad wanaagsan oo uu bulshada ku dhex yeesho barnaamijka quudinta dugsiyadu, adkaynta maaraynta maaliyadda, dhisidda karaanka hawlwadeennada, hagaajinta nidaamka waxsoo-iibsiga, kormeerka iyo qiimaynta oo uu barbar socdo isla-xisaabtan guud oo diiradaysan.

Sidaa awgeed, waxaa lamahuraan ah in la helo siyaasad qaran oo ku abbaaran Quudinta Dugsiyada iyo bixinta barnaamij quudin dugsiyeed oo taabbagal ah. Hadafka Siyaasadda Quudinta Dugsiyada Qaranku waa in la hirgeliyo waxqabad daadegsan, kaasoo u saamaxaya carruurta u jarmaada dugsiyada in ay helaan cunto caafimaad iyo nafaqo leh oo gudaha dalka kasoo go'day. Tallaabadani waxay horseedaysaa in la yareeyo saboolnimada iyada oo loo marayo sare-u-qaadidda dakhliga qoysaska iyo horumarinta dhaqaalaha gudaha.

Waxaan ugu baaqayaa dhammaan heerarka kala duwan ee hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn inay guddoomaan ayna hawlgeliyaan siyaasaddan si loo gaaro ahdaafta qaran ee waxbarasho gaar ahaan ballaarinta iyo tayeynta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada ee guud ahaan dalka.

Mahadsanidiin

**Mudane, Faarax Sheekh Cabdulqaadir**
Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare
ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.



II

**MAHADCELIN**

Ugu horrayn, waxaa mahad oo dhammi u sugnaatay Eebbaha Awoodda leh ee noo waafajiyay inaan siyaasaddan qaran dhammaystirno. Siyaasadda Qaran ee Quudinta Dugsiyada Soomaaliya waa natiijada geeddi-socod wadatashi ballaaran oo hufan, kaasoo lala yeeshay daneeyeyaasha heer qaran iyo heer gobol labadaba.

Intaas kaddib waxaan u mahadnaqayaa Marwo Nuura Mustafa Mukhtaar, Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Waxbarashada, iyo Mudane Cabdirashid Maxamed Ducaale, Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Waxbarashada, oo labaduba muujiyay dadaal hagar la'aan ah, xilkasnimo iyo garab istaag joogto ah intii lagu guda jiray horumarinta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada Soomaaliya. Si la mid ah, waxaan si khaas ah uga mahadcelinayaa Xasan Maxamed Cali, Xoghayaha Joogtada ah ee WWH&TS, guubaabadiisa, garab istaagiisa iyo aragtidiisa hoggaamineed oo qayb libaax leh ka qaadatay dhammaystirka siyaasaddan. Sidaas oo kale, aan u mahadnaqo Cabdullaahi Cabdi Cumar, Agaasimaha Guud ee Waaxda Waxbarashada Asaasiga ah oo intii ay diyaarinta siyaasaddu socotay muujiyay hoggaamin heerkeedu sarreeyo, murti iyo hanuunin joogto ah.

Marka xiga, Waxaan bogaadinayaa kooxda Iskuduwidda Quudinta Dugsiyada ee Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (WWH&TS) ee uu hoggaaminayo Ciise Mire Nuur, Iskuduwaha Quudinta Dugsiyada; Mustaf Cabdinaasir Maxamuud, Maareeyaha Xogta Quudinta Dugsiyada, kuwaas oo door mug leh ka qaatay taageerada iyo tabantaabinta geeddisocodkan. Sidoo kale, waxaan qaddarin iyo mahadnaq gaar ah u jeedinayaa Sahra Cabdulqaadir Cali, Agaasimaha Waaxda Waxbarashada Loo Dhan Yahay, oo muujisay dhiirrigelin, dulqaad iyo taageero mug leh intii lagu guda jiray hawshan daalka badan iyo diyaarinta siyaasadda.
Intaas kaddib, waxaan si qotodheer oo maamuus leh uga abaalnaqeynaa Hannah Peterson, Maareeyaha Quudinta Dugsiyada ee Hay'adda Cuntada Adduunka (HCA) ee Soomaaliya, kaalinta weyn ee ay ka qaadatay iskuduwidda guud iyo hagidda dhismaha siyaasaddan. Waxaa kale oo aan rabaa inaan si ixtiraam ku dheehan yahay ugu mahadnaqo xubnaha kale ee ka tirsan HCA Soomaaliya ee wax ku darsaday geeddisocodkan, kuwaasoo kala ah: Axmed Saney, Sargaalka Siyaasadda Barnaamijka; Xamdi Khaliif, Khabiirka Daryeelka Bulshada iyo Sayid Risaaq, Madaxa Horumarinta Karaanka Aadanaha.

Waxaa iyana si xushmad leh ugu mahadnaqayaa shakhsiyaadka kala ah: Ibraahin Axmed Cismaan; Sumaya Cabdirashiid Maxamed, Cali Cabdi Maxamed, Ismaaciil Cabdullaahi Cabdi iyo Maxamuud Xasan Abdulle kuwaas oo kaalin mug leh ka qaatay geeddi-socodka diyaarinta iyo dhammaystirka siyaasaddan.
Intaas waxaa dheer oo aan qiraynaa kaalinta muhiimka ah ee ay ka qaateen Wasaaradaha Waxbarashada ee Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka, Agaasinka Dugsiyada, Waalidiinta, Maamulayaasha, Macallimiinta Dugsiyada iyo sidoo kale ardayda, kuwaasoo oo dhammaantood si waxku'ool ah uga qeyb qaatay wajiga wadatashiga siyaasaddan iyagoo ku biiriyay talooyin iyo aragtiyo waxtar leh.

Sidoo kale, waxaan abaal weyn uga haynaa taageeradii farsamo ee ay bixiyeen HCA iyo Qaramada Midoobay iyo sidoo kale doorka muuqda ee ay ka qaateen dhammaystirka iyo iskudubbaridka siyaasaddan qaran ee aadka muhiimka u ah.



III

## TUSMADA


.................................................................................................................................. I

GOGOLDHIG ................................................................................................................... I

Ereyada Lasoo Gaabiyay ................................................................................................ VII

.................................................................................................................................. VII

QEEXIDDA EREYADA...................................................................................................... VIII

ARAR ................................................................................................................................ X

QAYBTA KOOWAAD .......................................................................................................... 1

1.0 HORDHAC...................................................................................................................... 1

1.1 SOOYAALKA SIYAASADDA ............................................................................................ 1

1.1.2 SABABAHA SIYAASADDA KEENAY ............................................................................ 2

1.1.3 GEEDDISOCODKA HORUMARINTA SIYAASADDA ........................................................ 3

1.2 UJEEDOOYINKA SIYAASADDA......................................................................................... 4

1.3 XAALADDA DHAQAN-DHAQAALE.................................................................................... 4

1.4 XAALADDA SIYAASADDA IYO SHARCIGA ......................................................................... 5

1.5 XAALADDA WAXBARASHADA ......................................................................................... 6

1.6 XAALADDA NAFAQADA IYO SUGNAANTA CUNTADA ....................................................... 7

1.7 XAALADDA KA-QAYBGALKA BULSHADA ......................................................................... 8

1.8 BARNAAMIJKA QUUDINTA DUGSIYADA EE DALAGYADA DALKA......................................... 9

1.8.1 DALDOOLLADA HIRGELINTA QUUDINTA DUGSIYADA .................................................. 9

1.9 ARAGTIDA ISBADALKA SIYAASADDA QARAN EE QUUDINTA DUGSIYADA ........................... 11

JAANTUSKA 1: QAABDHISMEEDKA FEKRADDA GUUD EE BQD SOOMAALIYA.............................. 12

QEYBTA LABAAD ............................................................................................................ 13

JIHOOYINKA SIYAASADDA................................................................................................ 13

2.1 HIMILO IYO HAWLGAL .................................................................................................. 13

Himilada ........................................................................................................................ 13

Hawlgalka ...................................................................................................................... 13

2.2 BAAXADDA SIYAASADDA DIB LOO EEGAY (SDLE) ............................................................ 13

2.3 MABAADI'DA HAGAYA SIYAASADDA .............................................................................. 13

QEYBTA SADDEXAAD ...................................................................................................... 15

BAYAANNADA SIYAASADDA IYO ISTARAATIJIYADAHA ........ 15
3.0. HORDHAC ........ 15
3.1 Aag-siyaasadeedka 1aad: Kobcinta Helitaanka, Joogteynta, Tayada iyo xaqsoorka Waxbarashada Asaasiga ah. ........ 15
3.1.1 Hordhac ........ 15
3.1.2 Bayaanka Siyaasadda ........ 16
3.1.3 Istaraatijiyadaha ........ 16
Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay qaadi doontaa tallaabooyinka soo socda: ........ 16
3.2. Aag-siyaasadeedka 2aad: Horumarinta heerka caafimaadka iyo nafaqada carruurta dugsiyada ........ 17
3.2.1 Hordhac ........ 17
3.2.2 Bayaanka Siyaasadda ........ 18
3.2.3 Istaraatijiyadaha ........ 18
3.3. Aag-siyaaasadeedka 3-aad: Xoojinta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada ee Waddaniga ah (BQDW) ........ 18
3.3.1: Hordhac ........ 18
3.3.2 Bayaanka Siyaasadda ........ 18
3.3.3 Istiraatiijiyaha ........ 19
3.4: Aag-siyaaasadeedka 4-aad: Adkeynta Iskaashiga iyo Ka-qaybgalka Bulshada Degaanka. ........ 19
3.4.1: Hordhac ........ 19
3.4.2 BAYAANKA SIYAASADDA ........ 19
3.4.3 ISTIRATIIJIYADAHA ........ 20
3.5. Aag-siyaaasadeedka 5-aad: Horumarinta maamul-wanaagga, iskuduwidda dhinacyada badan leh, iyo warbixinta ........ 21
3.5.1: Hordhac ........ 21
3.5.2 BAYAANKA SIYAASADDA ........ 21
3.5.3 ISTARAATIJIYADDA ........ 21
3.6: Aag-siyaasadeedka 6-aad: Abaabulka kheyraadka iyo Istaraatijiyadda Maalgelinta QD ........ 22
3.6.1: Hordhac ........ 22



V

3.6.2 Bayaanka Siyaasadda ..... 22

3.6.3 Istaraatijiyadaha ..... 22

3.7. Aagga-siyaasadeedka 7-aad: Taageerada Gacanta badbaadada ee xilliyada adag ..... 23

3.7.1 Hordhac ..... 23

3.7.3. Bayaanka Siyaasadda ..... 23

3.7.4 istaraatijiyadaha ..... 23

QEYBTA AFARAAD ..... 24

HIRGELINTA IYO QAABDHISMEEDKA ISKUDUWIDDA ..... 24

4.0 Hordhac ..... 24

4.1 Hab-dhismeedka Hay'adaha ..... 24

Jaantuska 2aad: Qaabdhismeedka iskuduwidda Dhinacyada Badan ..... 27

Jaantuska 3aad: Qaabdhismeedka Maamulka iyo Maareynta QD ..... 28

4.2 Doorarka iyo Mas'uuliyadaha Saamilayda ..... 30

4.3. Cilmi-baarista, Kormeerka, Qiimeynta iyo Barashada ..... 34

4.3.1 Hordhac ..... 34

4.3.2 Bayaanka Siyaasadda ..... 34

4.3.3 istaraatijiyadaha ..... 34

4.4 Dhaqangelinta Siyaasadda iyo Dib-u-eegista ..... 35

TIXRAACYADA LA KAASHADAY ..... 37



VI

## Ereyada Lasoo Gaabiyay

| | |
|---|---|
| SQDQ | Siyaasadda Quudinta Dugsiyada ee Qaranka |
| GWB | Guddiga Waxbarashada Bulshada |
| QIQW | Qorshaha Istaraatijiga ee Qeybta Waxbarashada |
| QIQ | Qorshaha Isbeddelka Qaranka |
| ICW | Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxabarashada |
| WWHT&S | Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Soomaaliya |
| BQDQ | Barnaamijka Quudinta Dugsiyada Qaranka |
| QD | Quudinta Dugsiyada |
| BQDW | Barnaamijka Quudinta Dugsiyada ee Waddaniga ah |
| BQDNK | Barnaamijka Quudinta Dugsiyada ee Nafaqo-kobcinta |
| YHW | Yoolalka Horumar Waara |
| XKC | Xarumaha Korriimada Carruurta |
| BQD | Barnaamijka Quudinta Dugsiyada |
| DFS | Dawladda Federaalka Soomaaliya |
| DGXKF | Dawlad-goboleedyada Xubnaha Ka ah Federaalka |
| HCA | Hay'adda Cuntada Adduunka |
| UDA | Ururrada Aan Dawliga Ahayn |
| QM | Qaramada Midoobay |
| BGD | Barkacayaasha Gudaha Dalka |
| WG | Waxsoosaarka Gudaha |
| BFN | Biyaha, Fayadharka Nadaafadda |
| GIHJQD | Guddiga Isku-dhafka Hay'adaha Jiheynta Quudinta Dugsiyada |
| GQDHG | Guddiga Quudinta Dugsiyada ee Heer Gobol |
| GQDHD | Guddiga Quudinta Dugsiyada ee Heer Degmo |
| WQD | Waaxda Quudinta Dugsiyada |
| GQD | Guddiga Quudinta Dugsiyada |
| GGLL | Ganacsiyada Gaarka Loo Leeyahay |
| KFW-BQDW | Kooxda Farsamada wasaaradaha kala duwan ee BQDW |

## QEEXIDDA EREYADA

| | |
|---|---|
| Waxbarasho Aasaasi ah | Waxay ka kooban tahay heerarka waxbarashada dugsiga hoose, dhexe iyo sare, ama sida lagu qeexay xeerka waxbarashada. |
| Dheefsadayaasha | Dadka ka faa'iidaysanaya Barnaamijka Quudinta Dugsiga oo ay ka mid yihiin: carruurta dugsiyada, qoysaska iyo bulshada degaanka. |
| Hannaan La Daadejiyay | Waa hannaan hawlaha maamulka ee Barnaamijka Quudinta Dugsiga, khayraadka iyo masuuliyadaha loogu daadejinayo Dawlad-goboleedyada, dawladaha hoose, dugsiyada iyo bulshada. |
| Daaweynta gooryaanka | In carruurta dugsiyada laga daweeyo gooryaanka iyada oo la adeegsanayo daawooyinkan (albendazole, mebendazole, ama praziquantel) si loo xakameeyo caabuqyada gooryaanka mindhiciraha sida helminths (gooryaan-giraan, gooryaanka dhiigga, gooryaan-jillaabeedka) iyo xanuunnada uu sababo jeermiska cayayaanka schistosomiasis |
| Quudinta Dugsiyada Xilliyada Degdegga ah | Bixinta cunto loogu talaggalay carruurta dugsiyada dhigata xilliyada ay jiraan xaalado degdeg ah oo loo aqoonsaday inay yihiin xaalado bani'aadannimo (humanitarian crises). |
| Xoojinta Cuntada | Hannaanka lagu kordhiyo qaddarka nafaqooyinka muhiimka ah ee macdanta yaryar (micronutrients) sida fitamiin A, birta (iron), iodine-ta ama zinc lagu daro cuntooyinka. |
| Maamul-wanaag | Habka go'aamada iyo arrimaha hortebinta leh loo dejiyo inta lagu guda jiro hirgelinta BQD, iyo sida ay daneeyayaashu isla xisaabtan ugu leeyihiin mas'uuliyadda fulinta barnaamijka. |
| BQDW | Barnaamij bixiya cunto kala jaad ah oo nafaqo iyo caafimaad leh oo lagu quudiyo carruurta dugsiyada, taasoo laga helo beeraleyda ama ganacsatada yaryar ee degaanka, si loo dhiirrigeliyo wax-soosaarka iyo suuqyada cuntada gudaha. |
| Iskuduwidda Dhinacyada Badan | Wadashaqaynta u dhexaysa saamileyda kala duwan ee BQD iyo dhinacyada badan ee ku lugta leh, iyadoo la doonayo in si wadajir ah loo gaaro yoolalka BQD. |
| Dheef dheellitiran | Cunto buuxisa baahida jirka ee nafaqeeyayaasha muhiimka ah sida borotiinka, fiitamiinada iyo macdanaha, balse aan ka badan baahida tamarta iyo dufanka ee qofka. |
| BQDQ | Barnaamijka Quudinta Dugsiyada oo laga hirgeliyay DGXKF Soomaaliya, oo ay si wadajir ah u maamulaan Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyadu, iyadoo ay taageerayaan hay'adaha QM, bahwadaagta horumarinta, UDA iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, si carruurta dugsiyada loo siiyo cunto joogto ah guud ahaan dalka. |
| Nafaqo-kobcinta | Quudin dugsiyeed daboolaysa tirada, tayada iyo nafaqeeyayaasha loo baahanahay ee ku habboon da'da iyo heerka korriimada ardayga |


VIII

| | |
|---|---|
| Ka-qaybgalka | Ka-qaybgal firfircoon oo dhab ah oo ay bulshada degaanku ku leedahay BQD oo ay ku jirto hirgelinta siyaasadaha la xiriira barnaamijka iyo qaadista tallaabooyin lagu wanaajinayo. |
| Waxsoo-iibsiga | Habka raadinta, iibsashada iyo helidda badeecooyinka cuntada loo baahan yahay iyadoo ujeeddadu tahay in Barnaamijka Quudinta Dugsiyada waqtiga ku habboon lasoo gaarsiiyo sahay cunto oo tayo leh islamarkaana joogto ah. |
| Waxsoosaarka | Hawlaha la xiriira ama kasoo baxaya waxsoosaarka beeraha/xoolaha iyo suuqgeynta. |
| Gacan badbaado | Barnaamijyada bixinta lacag caddaan ah ama adeegyo waxtar leh oo u dhigma, oo si toos ah, joogto ah, oo la saadaalin karo loogu gacan qabto qoysaska nugul, si loo yareeyo saboolnimada ama nuglaanta, korna loogu qaado adkaysigooda marka ay la kulmaan xaalado adag, loogana shaqeeyo sugnaanta cuntada. |
| Quudinta Dugsiyada | Bixinta cunto loogu talagalay carruurta dugsiyada dhigata iyadoo gudaha dugsiga lagu siinayo ama ay saamigooda guriga u qaadanayaan, sidoo kale qoysaska ayaa helaya cunto si loo sugo inay ardayda dugsiga ku sii hayaan. |
| Adgeeg-bixinta | Guud ahaan geeddisocodka hawlaha quudinta dugsiyada oo ay ku jiraan: waxsoosaarka, waxsoo-iibsiga, saadka iyo farsamaynta, qeybinta cuntada ee dugsiyada, diyaarinta iyo karinta si ardaydu waqti habboon u helaan quudin nafaqo leh oo tiro ahaan ku filan, tayo ahaan u hoggaansan beegaalka la isla gartay, islamarkaana ku kacaysa kharash macquul ah. |
| Beeraleyda yaryar | Beeraleyda noloshoodu ku tiirsan tahay beerashada dhul kooban islamarkaana soo saara cunto yar. |
| Daryeelka bulshada | Barnaamijyo loogu talaggalay in lagu taageero shakhsiyaadka iyo dadka nugul si ay u yeeshaan dhabar-adeyg ay ku wajahaan khataraha islamarkaana u helaan fursado xaqsooran. |
| Daneeyayaasha | Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, hay'adaha, shakhsiyaadka, kooxaha, bahwadaagta, dugsiyada, waalidiinta, bulshada iyo cid kasta oo ku lug lahaan karta ama ay SQDQ saameyn karto. |
| Istaraatijiyad | Qorshaha ugu habboon ee la doorto si loo gaaro yool gaar ah oo ka tirsan siyaasadda. |
| Bartilmaameedsi | Hannaan diiradda saara kheyraadka barnaamijka si ay u gaaraan dadka saboolka ah ama kuwa nugul. |
| Kala-guur | In si tartiib tariib ah hoos loogu dhigo taageerada saaxiibada caalamiga ah, islamarkaana ay dawladdu dusha saarato mas'uuliyada hirgelinta BQD. |

## ARAR

Iyadoo ay jirto saboolnimo baahsan, sugnaan la'aan cunto, iyo macluul, Quudinta Dugsiyadu (QD) waxay in ka badan labaatan sano Soomaaliya ka ahayd gacan badbaado oo madhaafaan ah, taasoo carruur badan u suurtagelisay inay qayb ka noqdaan fursadaha waxbarasho ee asaasiga ah, islamarkaana ay helaan dheef dheellitiran oo maalinle ah, gaar ahaan ardayda dhigata dugsiyada hoose. Si kastaba ha ahaatee, hababkii kala duwanaa ee Quudinta Dugsiyada ee dalka laga hirgeliyay sanadihii lasoo dhaafay waxay wateen caqabado dhawr ah, oo ay ka mid yihiin: Kharash dhaqaale iyo maamul oo sarreeya, kaabayaal daciif ah, iyo kobaca dhaqaale ee gudaha oo hooseeyay gaar ahaan dhinaca waxsoosaarka iyo farsamaynta cuntada.

Sababtaas awgeed, DFS waxay horay u qaadday tallaabo horumarineed si ay Quudinta Dugsiyada ugu darto Qorshaha Isbeddelka Qaranka (QIQ) ee cusub (2025-2029). Nuxurka asaasiga ah ee hannaankan cusub waa in la helo hannaan gudaha dalka lagu dhisay iyadoo laga faa'iidaysanayo waxsoosaarka gudaha. Cuntada waxaa soo saari doona oo farsamayn doona beeralayda Soomaaliyeed waxaana taabbagelinta barnaamijka hormuud ka noqon doona hay'adaha iyo fuliyeyaasha qaranka.

Fekradda guud ee Barnaamijka Quudinta Dugsiyada Waddaniga ah (BQDW) ayaa si rasmi ah loogu adkeeyay doodwadaag dhacday bishii Oktoobar 2023. Barnaamijka Quudinta Dugsiyada ee Waddaniga ah waxaa la horumarin doonaa lana dhaqangelin doonaa iyadoo lala kaashanayo daneeyayaasha ku lugta leh.

Ujeeddadu waa in la dammaanad qaado in ubad kasta uu saamigiisa waxbarashada helo iyadoo uu taageerayo BQD ee waara. Si loo xaqiijiyo himiladan waxaa xoogga la saarayaa saddex tiir ah oo aasaas u ah siyaasadda: -

**1-Bedqab dhammeystiran:** Si loo gaaro waxbarasho waxku'ool ah waxaa lagama maarmaan ah in la helo degaan iyo jawi dhiirrigelinaya sida dhisme tayo leh iyo cunto ku filan oo nafaqo leh oo dugsiga laga helo.

**2-Waxbaris iyo Barasho Tayaysan**: Waxbaris iyo barasho tayo si sahlan laguma gaari karo haddii ardaygu wax ku baranayo fasal liita ama calooshiisu maran tahay.

**3-Helitaanka Cunto Loo Siman Yahay**: Dhammaan carruurta dhigata dugsiyada Dawladda iyo da'yarta waxbarashada ku jirta waa inay helaan cunto fiican oo nafaqo leh taasoo iyaduna dammaanad qaadaysa dugsiyo iyo waxbarasho tayo leh.

Yoolka Siyaasadda Quudinta Dugsiyada ee Qaranka (2025) ayaa ah in la taabbageliyo kobac dhan walba ah oo ay ku tallaabsadaan carruurta, beeralayda, dadka waxsoosaara, iyo bulshada oo dhan, iyadoo la sugayo in Quudinta Dugsiyada loo aqoonsado islamarkaana loo tixgeliyo inuu yahay barnaamij waaraya iyo maalgashi dhinacyo badan leh, kaasoo taageero ka helaya daneeyayaal kala duwan oo ay ka mid yihiin; dawladda (heer dhexe iyo heer maamul-goboleed), bulshada, ganacsiyada gaarka loo leeyahay (GGLL), ururrada rayidka ah, qurbajoogta iyo deeq-bixiyayaasha caalamiga ah. Waxaa loo hanweyn yahay in siyaasaddani saamayn togan ku yeelato labo dhinac oo muhiim ah:

**1-Caafimaadka iyo Nafaqada Dugsiga:** In la dhimo nafaqo-xumada xilliga dheer iyo tan muddada kooban ah oo ay qayb ka tahay yaraynta gaabiska ka jira tamarta borotiinka iyo

macdanta yaryar ee nafaqeeyayaasha, iyadoo ardayda la siinayo xirmo aasaasi u ah nafaqo-celinta iyo waxbarashada.
**2- Beeraha**: In la kordhiyo waxsoosaarka cuntada qaranka iyo farsamaynta iyadoo loogu deeqayo beeralayda yaryar ee gudaha suuq deggan oo la isku hallayn karo islamarkaana lagu dhiirrigeliyo tartan furan, kor u qaadista mihnadda, iyo ka ganacsiga dalagga gudaha dalka lagu soo saaro.
Siyaasaddu waxay si adag ugu qareemaysaa ka qaybqaadasho firfircoon oo ay sameeyaan wasaaradaha ay khusayso ee ku hawlan dhammaystirka Quudinta Dugsiyada iyadoo ay wehliso waajibaadkooda shaqo ee rasmiga ah. Waxay si gaar ah diiradda u saaraysaa dhisidda iskaashi xooggan oo dhex mara bahwadaagta horumarinta, GGLL, iyo ururrada bulshada rayidka ah.

WWH&TS waxay hubin doontaa in Barnaamijka Quudinta Dugsiyada Qaranka si hufan oo daahfuran looga dhaqangeliyo dugsiyada iyadoo la adeegsanayo nidaamka maaraynta xogaha oo waxtar leh.



XI

Boggan Si Ula Kac ah Ayaa Looga Tegay.

## QAYBTA KOOWAAD

## 1.0 HORDHAC

### 1.1 SOOYAALKA SIYAASADDA

Siyaasaddan Quudinta Dugsiyada ee Qaranku waxay ku lammaan tahay himilooyinka iyo qorsheyaasha guud ee qaranka oo ay ka mid yihiin QIQ ee dhowaan la gebagabeeyay, kaasoo ay Golaha Wasiirradu ansaxiyeen Khamiistii saddexaad ee bisha Febraayo, sannadkan 2025. Siyaasaddu waxay qeexaysaa qaabdhismeed guud oo lagu hagayo in guud ahaan geyiga laga hirgeliyo Barnaamijka Quudinta Dugsiyada iyo Kobcinta-nafaqada.

Quudinta Dugsiyada waxay door muhiim ka ciyaaraysaa dhiirrigelinta helista, tayaynta iyo xaqsoorka adeegga waxbarashada, taasoo ay dheer tahay wanaajinta caafimaadka carruurta dugsiyada dhigta iyo heerka nafaqadooda. Siyaasaddu waxay u dejisay himilo, hawlgal, yoolal, hadafyo, mabaadi', bayaanno siyaasadeed iyo istaraatijiyado fulineed.

Waqti xaadirkan, celceliska tirada isqorista ardayda dalka Soomaaliya ee Heerka Isdiiwaangelinta Guud waa 36% oo kaliya, halka ku dhowaad 4 milyan oo carruur ah oo da'da waxbarashada gaaray ay dugsiyada bannaanka ka joogaan. Sugnaan la’aanta cuntada ayaa si joogto ah u xumaynaysa, taasoo keentay in hoos-u-dhac ku yimaado caafimaadka iyo heerka nafaqada carruurta dugsiyada, tanina waxay si toos ah u saamaysay tayada waxbarashada.

Haddaba xaaladahan oo kale, QD waxay ahaanaysaa gacan badbaado oo muhiim u ah carruurta nugul, iyadoo xaqiijinaysa inay si joogto ah waxbarasho u helaan marka laga soo tago horumarinta iskuduubnida iyo hab-nololeedka bulshada[1]. Barnaamijka quudinta dugsiyada sidoo kale waa albaab muhiim ah oo laga galo hagaajinta nadaafadda bulshada, caafimaadka iyo hababka is-nafaqaynta ee heer qoys.

Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxay sii waddaa dadaallada ay ku adkaynayso awoodda hay'adaha si kor loogu qaado natiijooyinka waxbarasho, laguna maareeyo sugnaan la’aanta cuntada iyo nafaqada iyada oo loo marayo horumarinta kaabayaasha iyo dhammaan siyaasadaha heerarka kala duwan ee dowlada. Dadaalladani waa kuwo si wanaagsan loogu sharraxay QIQ (2025-2029), iyo sidoo kale Qorshaha Istaraatijiga ah ee Qeybta Waxbarashada [2022-2026], istaraatijiyadda nafaqada iyo dukumeentiyada kale.

Daraasadaha Bangiga Adduunka waxay muujinayaan in saddex xeeladood oo muhiim ah lama huraan u yihiin horumarinta natiijooyinka waxbarashada, kuwaasoo kala ah:

1)In la sugo, in carruurtu diyaar u yihiin inay wax bartaan islamarkaana dugsiyada aadaan oo waqti habboon is qoraan.

2) In carruurta dugsiyada lagu hayo iyadoo la wanaajinayo imaanshahooda iyo dhimista heerarka ka-bixitaanka.

---

[1] *HCA (2019). Warbixinta Sannadlaha ah ee Soomaaliya (2019). Qorshaha Istiraatijiga ah ee Soomaaliya ( 2019-2021)*

3)Ugu dambayntii, in la horumariyo waxbarashada iyada oo la xoojinayo garashada iyo ka-qaybgalka ardayda ee geeddi-socodka waxbarasho iyo habka waxbaridda (Bangiga Adduunka, 2020).

### 1.1.2 SABABAHA SIYAASADDA KEENAY

Guud ahaan caalamka, barnaamijyada quudinta dugsiyadu waa xeelad wax ku ool ah oo lagu yareyn karo gaajada carruurta dhigata dugsiyada, isla markaana lagu horumarinayo caafimaadkooda iyo waxbarashadooda. Siyaasadda Qaran ee Quudinta Dugsiyada Soomaaliya waxay qeexaysaa istaraatiijiyadda dalka ee muddada fog, iyada oo diiradda la saarayo afar yool oo muhiim ah:

**Yoolka 1aad: Kordhinta Is diiwaangelinta Dugsiyada**

Bixinta cunto nafaqaysan ee dugsiyadu waxay yareyneysaa gaajada carruurta, iyada oo sare qaadeysa kororka ardayda, ku nagaanshahooda iyo feejignaantooda waxbarasho. Barnaamijka quudinta oo si joogto ah loo hirgeliyo wuxuu noqon karaa hab waxku'ool ah oo lagu yareeyo saboolnimada, lagu horumariyo caafimaadka carruurta, laguna xoojiyo guud ahaan natiijooyinka waxbarasho.

**Yoolka 2aad: Horumarinta Caafimaadka iyo Nafaqada**

Siyaasaddu waxay mudnaan siineysaa in carruurta iyo dhallinyarada da'da waxbarashada ku jira ay helaan cunto nafaqo leh oo isku dheellitiran, si ay u daboolaan baahidooda maalinlaha ah. Nafaqada saxda ah waxay muhiim u tahay korriimadooda maskaxeed iyo waxbarashada, halka gaajadu si toos ah u wiiqi karto feejignaantooda iyo waxqabadkooda waxbarasho, sidoo kalena u horseedi karto caqabado horumarineed oo muddada fog ah.

**Yoolka 3aad: Xoojinta Beeraleyda Yaryar**

Siyaasaddu waxay dhiirrigelinaysaa in cuntada dugsiyada laga helo beeraleyda yaryar ee gudaha, taas oo fursad siinaysa beeraleyda si ay u helaan suuq joogto ah iyo dakhli xasilloon. Qaabkan wuxuu sidoo kale sare u qaadayaa helitaanka cunto cusub oo maxalli ah oo lagu quudiyo dugsiyada.

**Yoolka 4aad: Xoojinta Iskaashiga iyo iskuduwidda dhinacyada kala duwan**

Siyaasadda Quudinta Dugsiyadu waxay muhiimad gaar ah siinaysaa in la xoojiyo iskudubaridka iyo maamulka barnaamijka heer qaran iyo heer gobol. WWH&TS ayaa hoggaan ka noqon doonta hirgelinta hufan ee Barnaamijka Qaran ee Quudinta Dugsiyada. Siyaasaddu waxay kor u qaadaysaa hannaan iskaashi oo dhinacyo badan leh (multi-sectoral approach) iyadoo la dhiirrigelinayo wada-shaqeyn ka dhexeysa hay'adaha dowladda, ganacsiga gaarka loo leeyahay, ururada bulshada rayidka ah, jaaliyadaha dibadda, iyo qaybaha kale ee la xiriira sida waxbarashada, caafimaadka, beeraha, biyaha iyo horumarinta miyiga. Qaabkan wadajirka ah wuxuu suurtagelinayaa in la mideeyo aqoonta, khibradda, iyo kheyraadka bahwadaagta si loo gaaro himilooyinka iyo yoolalka wadajirka ah ee barnaamijka.

### 1.1.3 GEEDDISOCODKA HORUMARINTA SIYAASADDA

Horumarinta Siyaasadda Quudinta Dugsiyada waxay bilaabatay sanadkii 2021, iyadoo la adeegsanayo hannaan wada-jir ah, kaas oo koobaayey, falanqeyn qoto dheer oo taabanaysa daneeyayaasha barnaamijka, nuxurka siyaasadda, iyo habraacyada kale ee heer federaal iyo heer dawladgoboleed.

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare (WWH&TS) waxay qandaraas la saxiixatay labo la-taliye si ay u qoraan  Siyaasadda Quuudinta Dugsiyada. Wajigii koowaad ee geeddisocodka horumarinta siyaasadda wuxuu ku abbaarnaa dib-u-eegisyo si xeeldheer loo lafagguray oo la jaanqaadaya dhigaallada heer qaran iyo heer caalami laga soo billaabo; siyaasadaha, xeerarka, iyo warbixinnada la baahiyay ee la xiriira sugnaanta cuntada, waxbarashada, caafimaadka dugsiyada, nafaqada, iyo fayo-dhawrka.

Wajigii labaad ee geeddi-socodka horumarinta siyaasaddan wuxuu ka koobnaa faaqidaad xooggan oo lagu sameeyay daneeyayaasha muhiimka ah iyo hannaan ku dhisan wada-tashi ballaaran iyo doodwadaag lala yeeshay dhinacyo ka mid ah saamilayda, iyada oo la adeegsanayay tababbar-hawleedyo, kulammo dib-u-eegis, Xog-waraysiga Khubarada, dood-kooxeed diiradaysan iyo wayddiimo xog-ururin oo laga sameeyey dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah DFS.

Wadatashiyadu waxay ka qabsoomeen heerarka federaalka, dowlad-goboleedyada, iyo dugsiyada, waxaana ka qayb qaatay wakiillo ka socday wasaarado iyo waaxyaha Dawladda oo ka koobnaa heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, iyo sidoo kale daneeyayaal kale oo ka socda bahwadaagta horumarinta, Ururrada Aan Dawliga ahayn, xubnaha Guddiga Waxbarashada Bulshada, maamulayaasha dugsiyada iyo hawlwadeennada barnaamijka Quudinta Dugsiyada. Iyada oo lagu saleynayo dib-u-eegistii fadhiyadaas iyo wadatashiyadii lala yeeshay daneeyayaasha, ayaa la diyaariyay qabyo-qoraalka siyaasaddan.

## 1.2 UJEEDOOYINKA SIYAASADDA

Ujeedooyinka gaarka ah ee siyaasaddani abbaarayso waa:

1) In la horumariyo helitaanka waxbarashada, joogitaanka ardayda dugsiyada, iyo kor uqaadista tayada waxbarashada, iyadoo la xaqiijinayo in ardaydu si joogto ah u helaan cuntooyin nafaqo leh oo kala duwan.
2) In la xoojiyo nafaqada iyo caafimaadka guud ee carruurta dugsiyada islamar ahaantaana la siiyo cunto isku dheelitiran oo nafaqo leh .
3) In la taageero beeraleyda maxalliga ah, gaar ahaan kuwa yaryar, iyadoo la xoojinayo xiriirka u dhexeeya dugsiyada iyo beeraleyda, iyada oo loo marayo Barnaamijka Qaran ee Quudinta Dugsiyada.
4) In la sameeyo iskaashi wax ku ool ah iyo wada shaqayn dhinacyo badan leh, kaasoo ku saabsan maamulka, maareynta iyo hirgelinta Barnaamijka Qaran ee Quudinta Dugsiyada.

## 1.3 XAALADDA DHAQAN-DHAQAALE

Tirada guud ee dadka Soomaaliyeed waxaa lagu qiyaasaa inay gaarayso 19,332,476 (Sagaal iyo toban milyan, sadex boqol sodon iyo labo kun, afar boqol todobaatan iyo lix qof). Iyadoo oo 29% ka mid ahi da'doodu u dhexayso 6-18 jir[2]. Waxaa xusid mudan in 3.9 milyan oo ka mid ah yihiin Barakacayaasha Gudaha Dalka[3]. Dhaqaalaha waddanku wuxuu si weyn ugu tiirsan yahay beeraha iyo xoolaha, taasoo ka dhigan inay yihiin 65% Waxsoosaarka Gudaha (WG) iyo shaqo-abuurka bulshada[4]. Qaybta xoolaha ayaa ka dhigan qiyaastii 40% WG iyo in ka badan 50% dakhliga dhooftinta laga helo.[5]

Roobabka sanadlaha ah oo yar, abaaraha oo soo noqnoqda, isbeddelada cimilada oo aan la sadaalin karin, qiimaha cuntada oo is bedbeddalaya, khilaafyo, iyo colaadaha joogtada ayaa sii tarmiyay nuglaanta dalka ee dhinaca sugnaan la'aanta cuntada taas oo si weyn u xagaldaacisay horumarinta iyo kobaca dhaqaalaha.

Dowlada Federaalka Soomaaliya, waxay horumar la taaban karo ka sameysay taabbagelinta dhismaha hay'do dawladeed islamarkaana dimoqraaddi ah kuwaas oo ka amba qaaday ansaxintii dastuurka Soomaaliya 2012-dii.

Sanadkii 2017, ayey aheyd markii manhaj waxbarasho oo midaysan laga hirgeliyay guud ahaan dalka, taas oo horseeday natiijooyin wanaagsan oo dhanka waxbarashada ah.

[2] Wasaaradda Waxbarashada, NK&MXW (WWH&TS)

[3] Xarunta kormeerka Barakacayaasha Gudaha Dalka

[4] Siyaasadda Daryeelka Bulshada Soomaaliya – *March 2019*

[5] Qoraal Ku Saabsan Xaaladda Dalka Soomaaliya – Nuqul 1.0, December (2020)

## 1.4 XAALADDA SIYAASADDA IYO SHARCIGA

Siyaasadda Quudinta Dugsiyada Qaranka Soomaaliya waxay ku qotontaa qodobbo ku jira heshiisyada iyo axdiyada caalamiga ah ee Soomaaliya saxiixday, iyo sidoo kale siyaasadaha iyo qorsheyaasha horumarineed ee heer qaran iyo heer caalami, kuwaasoo ay ka mid yihiin:

- **Yoolasha Horumarka Waara:** Soomaaliya waxaa ka go'an inay xaqiijiso YHW, iyada oo u aragta in Barnaamijka Quudinta Dugsiyada uu si toos ah uga qayb qaato gaarista YHW2, YHW4 iyo YHW5, islamarkaana si dadban uga qayb qaato ka dhabaynta YHW1, YHW3, YHW8, YHW10, iyo YHW16**.**
- **Heshiiska Xuquuqda Carruurta iyo Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Daryeelka Carruurta :** Soomaaliya waxay ka mid tahay dalalka saxiixay heshiisyadan caalamiga ah, kuwaasoo dhigaya in la qaado tallaabooyin sharci, maamul, waxbarasho, bulsheed, iyo daryeel si loo xaqiijiyo xuquuqda carruurta oo ay ku jiraan xuquuqda waxbarashada, horumarinta, caafimaadka iyo siinta nafaqo ku filan**.**
- **Dastuurka ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya (2012):** Dastuurka ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu si cad u qeexayaa xuquuqda dhaqaale, bulsheed iyo waxbarasho ee ubadka.
- **Sida ku cad Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025-2029),** Hindisaha koowaad ee Ololaha Diiwaangelinta iyo kunagaanshaha goobaha waxbarashada waxaa lagu dhisay saddex tiir oo muhiim ah, kuwaasoo kala ah: Caafimaadka Dugsiga iyo Nafaqada, Dhiirrigelinta waxbarashada, iyo U-qareemidda iyo Dhaqangelinta. Tiir kasta wuxuu ka kooban yahay saddex qaybood kuwaasoo dhammaan ujeeddadoodu tahay in la gaaro horumar dhanka caafimaadka, nafaqada iyo badbaadada carruurta dugsiyada ah.
- **Sharciga Waxbarashada Guud (Heerka 1aad iyo Heerka 2aad):** Wuxuu hagitaan sharci ah ka bixiyaa nidaamka waxbarashada ee Soomaaliya, isagoo dammaanad qaadaya xuquuqda qof kastaa oo Soomaali ah u leeyahay helitaanka waxbarasho tayo leh oo heerar kala duwan isugu jirta. Waxaa kale oo uu xeerku faahfaahinayaa yoolalka waxbarasho ee heer qaran, gobol iyo degmo, iyo sidoo kale nidaamka bixinta adeegyada waxbarashada iyo natiijooyinka la filayo.
- **Siyaasadda Waxbarashada Qaran (2020):** Siyaasaddan waxa 28-dii Febraayo, 2020-kii ansixiyay golaha wasiirrada, waxayna hogaaminta iyo isku-duwidda howlaha waxbarasahda u xilsaartay WWH&TS sidoo kalena ay kaashato daneeyayaasha kale, si loo xaqiijiyo helitaanka waxbarasho loo dhan yahay.
- **Qorshaha Istaraatiijiyada Qaran ee Waxbarashada (2022-2026):** Qorshahani wuxuu faahfaahinayaa sida ay WWH&TS uga go'an tahay horumarinta tayada waxbarashada, gaar ahaan fasallada hore; baahinta helitaanka waxbarashada caruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyn, gaar ahaan kuwa ka soo jeeda bulshada aan fursadaha haysan sida xoola-dhaqatada iyo dadka saboolka ah ee magaalada, iyadoo la hiigsanayo bartilmaameedyada qodobka afaraad ee YHW**.**
- **Siyaasadda Qaran ee Daryeelka Bulshada (2019):** Waxay dejinaysaa himilada istiraatijiyadda qaran ee ku aaddan in la hirgeliyo lana adkeeyo nidaamyada daryeelka bulshada islamarkaana habnololeedkooda lagu hagaajiyo. Qaabdhismeedka Dhaqangelinta siyaasaddan wuxuu diiradda saarayaa yaraynta nugaylka bulshada iyo ku tiirsanaanta gargaarka banii'aadanimo ee muddada kooban ah.

- **Qorshaha istaraatijiga ah ee Dalka Soomaaliya (2016-2020):** Qorshahani wuxuu tilmaamayaa baahida loo qabo in la hubiyo in carruurta nafaqo-xumada iyo macluusha la daalaadhacaysa ay helaan heer nafaqo oo wanaagsan sidoo kelana beeralayda yaryar dheefsadaan nidaamyo cunto oo loo dhan yahay islamarkaana waara.
- **Istaraatijiyadda Nafaqada ee Soomaaliya (May, 2020):** istaraatijiyaddani waxay ku baaqaysaa in nafaqada loo aqoonsado qeyb muhiim ah oo ka mid ah waaxyaha kobcinta: nafaqada, fayadhowrka, caafimaadka, waxbarashada, siyaasadaha daryeelka bulshada, istaraatijiyadaha iyo hawlgallada la fulinayo inay noqdaan kuwo nafaqada kobcinaya.
- **Siyaasadda Caafimaadka Soomaaliya (2014):** Waxay mudnaanta siinaysaa xoojinta adeegyada caafimaad ee la xiriira taranka, hooyada iyo dhallaanka iyo kor u qaadidda nafaqadooda, iyo weliba sidoo kale ka hortagga iyo xakamaynta cudurrada la isu gudbiyo ee mudnaanta leh si loo dhimo heerka xanuunnada iyo dhimashada, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo shuban-biyoodka degdegga ah, daacuunka, xanuunnada dheefshiidka iyo kuwa neef-mareenka. Dugsigu wuxuu yeelanayaa madal muhiim oo lagu bixiyo xeeladaha ka hortagga cudurrada.
- **Qorshaha istaraatijiga ee Xoojinta Cuntada Qaranka Soomaaliya (2019–2024):** Qorshahan wuxuu ujeedkiisu yahay in la hagaajiyo xaaladda nafaqo ee dadka Soomaaliyeed iyada oo lala dagaallamayo yaraanta maaddooyinka yaryar ee nafaqeeyayaasha ah. Waxaa la isticmaalayaa farsamooyinka lagu kobciyo nafaqada cuntada si loo tiigsado horumar dhaqan-dhaqaale oo heer qaran ah.

## 1.5 XAALADDA WAXBARASHADA

WWH&TS waxay u xilsaaran tahay inay xaqiijiso tayeynta waxbarashada iyo kobcinta garaadka dhammaan muwaadiniinta si kor loogu qaado horumarka qaran iyo midka bulsho. Qorshaha istaraatijiga ee waxbarashadu wuxuu sharraxayaa ahmiyadda ay wasaaraddu siinayso ballaarinta helitaan waxabarasho tayo leh islamarkaana ardayda lagu qalabeeyo xirfado iyo aqoon u suurtagelinaya inay door ka qaataan dhaqaalaha bulshada.
Si kastaba ha ahaatee, colaadaha daba-dheeraaday, barakaca, iyo heerka saboolnimada ee aadka u sarreeya ayaa nidaamka waxbarashada ku yeeshay saamayn aad u ba’an. WWH&TS waxay ku daadalaysaa inay xoojiso awoodaha hay’adaha waxbarashada iyo nidaamyada ku wahajan kor-u-qaadista helitaanka iyo natiijooyinka waxabarashada. Hase yeeshee, qeybta waxbarashadu (Education Sector) waxay weli la tacaalaysaa caqabadaha soo socda:

- **U diyaarsanaan la’aanta dugsiga:** U diyaarinta carruurta dugsiga ee ka hor gelitaanka rasmiga ah ee dugsiga hoose iyada oo loo eegayo da’ada ku habboon waa arrin muhiim ah oo saamayn weyn ku leh nolasha carruurta, waxbarashada asaasiga ah iyo heerarka waxbarasho ee xiga. Si kastaba ha ahaate, ma jirto xog la taaban karo oo ku saabsan waxbarashada da’ada hore ee carruurnimada iyadoo carruur badan oo da’doodu u dhiganto fasallada hore ay weli dhigtaan dugsiyada Qur’aanka. Taasi waxay keentay inay yaraadaan carruurta si buuxda ugu diyaarsan inay ku biiraan waxbarashada rasmiga ah (WWH&TS, 2018).

- **Helitaanka Waxbarashada oo yar:** Kaliya 35% carruurta da’ada waxbarashada gaaray ayaa dugsiyada dhigta. Isdiiwaangelinta hoosaysa waxaa loo aanayn karaa saboolnimada, sugnaan la’aanta cuntada, gaajada, maqnaanshaha agab waxbarasho oo ku filan, yaraanta

macallimiinta iyo waxbarasho tayo leh, caqabado amni iyo caado-dhaqabameedyo labka iyo dheddigga kala doorbidaya. Intaas waxaa dheer, 4 milyan oo ka mid ah carrruurta da'ada waxbarashada gaartay ayaa dugsiyada bannaanka ka jooga. heerka imaanshaha guud ee dugsiyada waxaa lagu qiyaasaa in 21% ay gabdho yihiin, 30% wiilal yihiin, taa oo muujinaysa sinnaan la'aanta labka iyo dheddigga[6]. Meelaha qaar, qoysaska saboolka ah ee magaalooyinka dagan ayaa helitaanka iyo ka-qaybgalka waxbarashada aad ugu liita.

- **Tayo-yari waxbarasho:** Heerka sii joogista ardayda ilaa fasalka 5-aad wuxuu u dhexeeyaa 61 ilaa 74 boqolkiiba guud ahaan dalka, bulshada qaybteeda danyarta ah si gaar ah ayay uga sii hoosaysaa. Tani waxay horseeday in natiijooyinka waxbarasho iyo heerarka waxqabad ee ardaydu ay hoos dhacaan. Waxaa intaas dheer, inaysan jirin xog lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan heerka fahamka iyo waxbarashada ardayda, taasoo dhab ahaantii ah caqabad weyn oo hortaagan qiimeynta tayada waxbarashada dugsiyada hoose.
- **Daryeelka caafimaadka, nafaqada iyo fayadhowrka dugsiyada oo yar:** Yaraanta ama maqnaanasha adeegyada caafimaad iyo nafaqo ee dugsiyadu waxay saamayn toos ah ku leeyihiin natiijooyinka waxbarasho. Dhanka kale hirgalin adeegyadaas waxay gacan ka gaystaan kor u qaadidda caafimaadka, nafaqada, iyo ka hortagga cudurrada carruurta dugsiyada dhigta (Bangiga Adduunka, 2016)
- **Karaanka Waxbaridda iyo Waxbarashada:** WWH&TS waxay dadaal xooggan ku bixisay kordhinta barayaal tayo leh iyadoo saddexdii sano ee la soo dhaafay qortay 6,000 oo barayaal cusub ah. Si kastaba ha ahaatee, baahi badan oo dhanka barayaasha ah ayaa weli jirta, sida ku cad cilmi-baarisyada la sameeyay, si dhammaan ardayda da'da dugsiyada gaaray ay waxbarashada u galaan inay ay dawladda Soomaaliya u baahan tahay inay shaqaalaysiiso ku dhowaad 110,000 oo barayaal ah.[7]

## 1.6 XAALADDA NAFAQADA IYO SUGNAANTA CUNTADA

Xaaladda caafimaad iyo nafaqo ee carruurta dugsiyadu waxay door muhiim ah ka ciyaartaa waxbarashadooda iyo waxqabadkooda. Helitaan la'aanta nafaqo ku filan, yaraanta borotiinka iyo tamarta, jeermisyada deriskunoolka ah, iyo cudurrada kale waxay cuuryaamiyaan kartida waxbarasho ee carruurta iyagoo hoos u dhigaya korriinka garasho iyo awooddooda ka qaybgalka casharrada. Sidoo kale, carruurta dugsiyada dhigata waxay u baahan yihiin tamar dheeraad ah si ay u gutaan hawl-maalmeedkooda, mararka qaarna u jaraan masaafooyin dheer si ay dugsiga u tagaan ama uga soo noqdaan [WFP, 2020].

Cilmi-baarisyada ayaa muujinaya in Soomaaliya 59% la daalaadhacayso nafaqo-xumo ka dhalatay yaraanta birta (iron deficiency), halka 33.3% dadka faytamiin A-du ku yar yahay, islamarkaana isticmaalka dheefta cusbada iodine-ta leh ee heer qoys ay tahay mid aad u hoosaysa, 3.9% oo kaliya. Intaas waxaa dheer, gooryaanka xiidmaha iyo dulinnada dhiigga ayaa ah isha ugu weyn ee cudurrada iyo nafaqo-xumada carruurta dugsiyada Soomaaliya dhigata.

Daraasad ay si wada jir ah u sameeyeen HCA iyo DFS ayaa muujisay in qaadashada kaalshiyaamka, fitamiin A, folic acid (gaar ahaan dhallinyarada) iyo birtu ay ku yar yihiin

[6] WWH&TS/DFS (2017). Qorshaha Istaraatijiga ee Qeybta Waxbarashada (2018-2020)

[7] Xiriirka Waxbarashada, UNICEF, 2024

Soomaaliya. Daraasadu waxay sidoo kale daaha ka qaadday in shuruudaha nafaqeynta gabadhaha dhallinyarada ahi inay yihiin kuwa ugu qaalisan ee ay wajahaan qoysaska Soomaaliyeed, isla markaana aan lagu dabooli karin cuntooyinka gudaha oo kaliya (FSNAU, 2009).

Carruurtu sidoo kale waa kuwa ugu nugul cudurrada biyaha ka dhasha, sida jadeecada, iyo duumada. Sababaha ugu waaweyn ee keenaya caafimaad yarida iyo nafaqo-xumada carruurta dugsiyada waxaa ka mid ah colaadaha, abaaraha, sugnaan la'aanta cuntada, barakaca dadka iyo helitaan la'aanta adeegyada caafimaadka hooyada iyo dhallaanka iyo sidoo kale baahida loo qaabo shaqaalaha caafimaadka bulshada. Sidoo kale, waxaa aad u sarreeya heerka gaajada carruurta dugsiyada, gaar ahaan kuwa ka soo jeeda qoysaska saboolka ah ee reer miyiga ah, qayb ka mid ah dadka magaalooyinka deggan iyo barakacayaasha kuwaas oo inta badan wajahaya sugnaan la'aanta cunto oo aad u daran[8].

Ardayda macluusha iyo caafimaad-darrada la ildaran waxay seegaan fursado waxbarasho oo qiimo leh sababo la xiriira maqnaashahooda joogtada ah. Gaajada oo aad ugu badan carruurta dugsiyada ee kasoo jeeda guryaha sugnaan la'aanta cuntadu ka jirto waxay wiiqdaa dadaalkooda waxbarasho maadaama ay ardayda calooshoodu maran tahay ku cuslaanayso inay hawlaha waxbarashada ku gadaaman diiradda saaraan iskana tiiriyaan.

Intaa waxaa sii wehliya, in nafaqo-xumadu aysan kaliya wax u dhimayn awoodda garaadka iyo dareenka carruurta balse ay sidoo kale ugu wacan tahay in isdiiwaangelintu daahdo, fasallada lagu celceliyo, iyo ka-harid waxbarasho, taas oo horseedaysa fashilka nidaamka waxbarashada iyo hoos-u-dhaca natiijooyinka waxbarasho. Sidaas awgeed, waxaa lagama maarmaan ah in la hirgeliyo barnaamijyo Quudin Dugsiyeed oo nafaqo-kobcinta beegsanaya (nutrition-sensitive). Daraasado la sameeyay ayaa tilmaamaya in barnaamijyada QD ay yareeyaan gaajada, hagaajiyaan caafimaadka iyo nafaqada carruurta kor u qaadaan, sidoo kalena ay bulaaliyaan waxsoosaarka qaranka iyo fahamka carruurta ee ku aaddan xiriirrada u dhexeeya waxa aan beeranno iyo wax aan quudanno[9].

## 1.7 XAALADDA KA-QAYBGALKA BULSHADA

Qiimayn iyo daraasado lagu sameeyay barnaamijyo Quudin Dugsiyeed oo kala duwan oo ka hanaqaaday dalal badan oo adduunka ah ayaa muujinaya in barnaamijyada ugu xooggan uguna waari-og ay yihiin kuwa gudaha dalka ka dhashay ee ka jawaaba baahiyaha bulshada isla markaana kulansada isxilqaanka iyo ka-qaybgalka bulshada.

Barnaamijyada noocan ah ayaa aad ugu dhow inay si guul leh uga gudbaan ku-tiirsanaanta deeq-bixiyayaasha caalamiga ah, una xuubsiibtaan barnaamijyo qaran oo waara. xoojinta ka-qaybgalka bulshada ee barnaamijka quudinta dugsiyadu waxay sare u qaadi doontaa heerka lahaanshaha gudeed ee barnaamijkan, iyada oo loo marayo hannaan go'aan-qaadasho oo bulshada laga talo-geliyo inta lagu guda jiro hirgelinta barnaamijka.

[8] DFS (2019). Gorfeynta "Buuxi Daldaloolka Nafqeynta": Hannaan lagu xoojinayo xaaladda nafaqada iyo go'aan gaarista ku wajahan siyaasadaha qeybaha badan iyo isbedelka nidaamyada.

[9] Hay'adda Cuntada Adduunka, 2024

Sidoo kale, ka-qaybgalka bulshadu wuxuu dammaanad qaadi doonaa in kheyraadka bulshada ee aan horay looga faa'iideysan si hufan loo abaabulo loona dhiirrigeliyo, si Quudinta Dugsiyada looga dhigo barnaamij taabbagal ah oo waara.

Waxaa intaa wehliya, in la dhiso xiriir wadashaqayn oo toos ah oo dhex mara waxsoosaarka beeraha dalka iyo BQD, tallaabadaas oo horseedi doonta in door weyn bulshadu ka qaadato hawlaha dugsiyada, iyo ka-qaybqaadasho ballaaran oo kor u qaadi doonta dhinacyada caafimaadka iyo ladnaanta, tayada nolosha iyo badbaadada iyo waaritaanka degaanka.

## 1.8 BARNAAMIJKA QUUDINTA DUGSIYADA EE DALAGYADA DALKA

Barnaamijka quudinta dugsiyada ee dalagyada dalka wuxuu ku saleysan yahay in cuntada loo adeegsanayo quudinta dugsiyada laga soo iibiyo beeraleyda yaryar ee gudaha, si kor loogu qaado wax-soo-saarka beeraha dalka, loo xoojiyo nidaamyada cuntada gudaha, islamarkaana dadka looga samatabixiyo saboolnimada.

Barnaamijkan wuxuu ku hawlan yahay kordhinta saamaynta barnaamijyada joogtada ah ee Quudinta Dugsiyada, isagoo kordhinaya wax-soo-saarka cuntooyinka kaladuwan, iyada oo ay wehliso faa'iidooyin dhaqaale oo uu u leeyahay mujtamaca degaanka.

Barnaamijka quudinta dugsiyada ee dalagga dalka wuxuu hiigsanayaa ujeeddooyinka soo socda:

- In la xaqiijiyo bixinta cunto nafaqo leh oo ka soo go'day gudaha dalka, iyo kor-u-qaadidda kala-jaadnimada iyo dheellitirnaanta cuntada ardayda la siiyo.
- In la bulaaliyo suuqyada maxalliga ah iyo wax-soo-saarka cuntada ee gudaha, iyada oo loo marayo wadashaqayn toos ah oo lala yeesho beeraleyda yaryar iyo ganacsatada geddislayda ah ee dalka.
- In la xoojiyo awoodda iyo karaanka bulshada iyo maamullada degaanka ee ku aaddan maaraynta iyo hirgelinta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada.
- In la hiigsado isbeddel hab-dhaqan oo si rasmi ah loogu dhafo qaybaha naqshadeynta iyo hirgelinta barnaamijka, heer bulsho iyo heer dugsiba.

Barnaamijka Quudinta Dugsiyada (B.Q.D.) waxuu suuragalinayaa horumarinta meerto cunto-soosaaris oo ku kusalaysan arrimaha nafaqada, isla markaana loo siman yahay, taasoo kordhin doonta faa'iidada ay beeraleyda yaryar ka helaan barnaamijkan. Tani waxay door muhiim ah ka ciyaari doontaa qaabaynta iyo adkaynta nidaamyo cunto-gudeed oo waara, waxayna kor u qaadaysaa kala-duwanaanta cuntooyinka la bixiyo ee Quudinta Dugsiyada, iyadoo la hubinayo in la isticmaalay cunto cusub oo dheellitiran. Sidoo kale, tallaabadani waxay dhiirragalin doontaa dalbasho nidaamsan iyo suuqyo u heellan waxsoosaarka beeraha gudaha ee ay soo iib geeyaan qaybiyayaasha gudaha, tan oo hanti-u abuur u noqonaysa qoysaska miyiga.

### 1.8.1 DALDOOLLADA HIRGELINTA QUUDINTA DUGSIYADA

Hirgelinta barnaamijyada QD ee Soomaaliya waxay si toos ah uga jawaabtay baahiyaha bini'aadantinimo ee bulshada Soomaaliyeed wajahayso, iyadoo ujeeddada ugu weyn ay tahay in la yareeyo gaajada muddada-gaaban ee heysata carruurta dhigata dugsiyada.

Intaas waxaa dheer, BQD wuxuu waalidiinta Soomaaliyeed ku dhiirrigeliyay in ay carruurtooda ka diiwaangeliyaan dugsiyada, wuxuuna barnaamijku libin ka gaaray sare-u-qaadidda itaalka iyo karaanka waxbarasho ee ardayda, isla jeerkaasna wuxuu gacan ka geystay soo-kabashada bulshada nugul iyo in ay dib ugu soo laabtaan nolosha caadiga ah.

BQD sidoo kale waa gacan bulshada badbaadisa oo hubisa samatabaxa iyo sii-wadashada waxbarashada ee carruurta dugsiyada inta lagu gudo jiro waqtiyada qalalaasuhu jiraan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira daldaloollo culus oo u baahan in la gufeeyo si barnaamijka Quudinta Dugsiyadu u noqdo mid heer qaran ah oo raaga. Daldalloolada muuqda ee wax ka qabashada u baahan waa kuwaan hoos ku xusan:

- Inkastoo ay ahayd in dhammaan carruurta dhigata dugsiyadu ay ka faa'iidaystaan cuntada nafaqaysan ee dugsiyada laga bixiyo si ay waxbarashadooda tooska ah u kororto, uguna suuragasho in ay joogteeyaan oo dhammaystaan heerarka kala duwan ee waxbarashada dugsiga, balse BQD ee haatan jira waa mid aad u kooban. Dhanka kale, iyada oo uu bartilmaameedku muhiim yahay, haddana waa lagama-maarmaan in la kordhiyo dadaallada lagu xaqiijinayo in guud ahaan carruurta dugsiyada ay helaan quudin.

- Hay'adda Cuntada Adduunka ee Qaramada Midoobay ayaa qayb ka ah hirgalinta BQD gudaha Somaaliya halka Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada oo uu wehliyo sanduuqa caalamiga ee (Waxbarashada Dib Looma Dhigi Karo) ay xagga qarashka ka taageeraan ururrada aan dawliga ahayn ee bixiya quudinta dugsiyada ee qaybo ka mid ah dalka. Arrintan ayaa keentay in bixinta BQD ee haatan jira uu si weyn ugu tiirsanaado taakulada deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah, iyadoo uu aad u kooban yahay qaaraanka iyo kabka laga helo bulshada.

- Waxaa jirta in doorka iyo taageerada bulshada ee guduhu yahay mid aad u kooban, gaar ahaan dhinaca cunto-gaarsiinta dugsiyada, taas oo saameyn ku yeelan karta lahaanshaha bulsho ee barnaamijka iyo saldhigashadiisa.
- Dhanka kale, waxaa jira daneeyayaal badan oo adeegsanaya hannaanno kala duwan oo la xiriira xagga helitaanka, iyo hannaanka daabulidda iyo gaarsiinta cuntada, iyaga oo aan lahayn iskudubbarid iyo wadashaqayn ku filan, tan oo ay ka dhalan karto sinnaan la'aan ku timaadda xagga keenista cuntada ee Barnaamijyada Quudinta Dugsiyada.
- Hab-dhismeedka maamul ee BQD waa mid kor ilaa hoos hal jaho ah xag iskaashi iyo xiriir taasoo culaab ku ah naqshadaynta iyo hirgalinta barnaamijka.
- Soo iibsashada cuntooyinka quudinta dugsiyadu wuxuu hadda ku kooban yahay ganacsatada geddislayda ah ee gudaha, iyo caddad kooban oo laga soo qaato beeraleyda degaanka, taasoo muujinaysa baahida loo qabo in si hufan loo qeexo hannaankaan.
- Dugsiyada intooda badan waxaa ka maqan ama aad u hooseeya adeegyada kaaba BQD, sida: daryeelka caafimaadka ee dugsiyada gudahooda, nafaqada, nadaafadda, iyo adeegyada fayadhowrka, taasoo khatar gelin karta bixinta Quudinta Dugsiyada, maadaama cudurrada la xiriira nadaafad-darradu ay si toos ah u saameyn karaan carruurta dugsiyada.
- Waxaa jira daldaloollo culus oo la xiriira gaabiska ka taagan macaadinta iyo nafaqeeyayaasha yaryar ee loogu talaggalay carruurta dugsiyada ee gudaha Soomaaliya. Marka laga soo tago in ay dhif iyo naadir tahay xogta laga hayo baahida ka taagan macaadinta iyo nafaqeeyayaasha yaryar ee ardayda dhexdooda, barnaamijka QD ee hadda jira wuxuu u baahan yahay in la xoojiyo si loo xaqiijiyo nafaqeeyayaasha lamahuraanka u ah dhammaan ardayda da' kasta oo ay leeyihiin.

- Dugsiyadu waxay wajahaan caqabado la xiriira kaabayaasha loogu talaggalay kaydinta, diyaarinta iyo tamarta lagu karinayo cuntada oo aan gaarsiisnayn intii la rabay, taasoo halis gelin karta tayada iyo badqabka cuntada la siiyo ardayda.

- Jadwal waxabarasheedka maalintii ee dugsiyada dalka Soomaaliya wuxuu ku socdaa hadda maalin barkeed (7:00am-12:00pm, iyo 1:00pm-5:00pm). Saacadahan waxabarasho oo yar daraadeed waxaa meesha ka baxaya ku nagaanshaha dugsiga ee ardayda. Si Siyaasadda qaran ee quudinta dugsiyadu looga miro-dhaliyo, waxaa lagama maarmaan ah in la kordhiyo saacadaha waxbarashada, iyo in dib loo qaabeeyo hab-dhismeedka hadda jira ee dugsiyada.

## 1.9 ARAGTIDA ISBADALKA SIYAASADDA QARAN EE QUUDINTA DUGSIYADA


Aragtida isbadalka siyaasadda qaran ee quudinta dugsiyadu waxay hagaysaa hirgelinta barnaamij quudin dugsiyeed oo qaranku leeyahay, maamulo islamarkaana waaraya. Waxaa xusid mudan in QD ay door muhiim ah ka ciyaarto wax ka qabashada laba caqabadood oo isku sidkan: yareynta gaajada carruurta dugsiyada dhigata, iyo xoojinta midnimada bulshada iyo weliba sidoo kale horumarinta natiijooyinka waxbarasho. Si wax looga qabto caqabadaha kor ku xusan, siyaasaddani waxay hiigsaneysaa hirgelinta barnaamijka Quudinta Dugsiyada oo isku-dhafan, dhammaystiran, lana jaan qaadaya hannaanka daadejinta awoodaha, kaasoo muddo dheer si waxku-ool ah uga qayb qaadan doona horumarinta karaanka aadanaha dalka, iyadoo loo marayo hagaajinta caafimaadka iyo waxbarashada jiilka wax baranaya.

Caafimaadka dugsiga iyo heerka nafaqo ee carruurta oo la wanaajinayo waxay si toos ah uga dhex muuqaneysaa tayada waxbarashada iyo waxqabadka dhaqaale ee dalka, maxaa wacay, ilmaha sida fiican loo nafaqeeyay dugsiga ayay muddo dheer sii joogaan. Waxay kasbadaan xirfadaha shaqooyinka fiican lagu helo, waxayna karaariyaan kobaca dhaqaale ee waddanka. Ugu dambayn, arrintani waxay kordhinaysaa fursadaha shaqo, docda kalena waxay dhimaysaa sinnaan la’aanta dhaqan-dhaqaale ee guud ahaan dalka Soomaaliyeed. Qaabdhismeedka fekradda guud ee siyaasaddan (fiiri jaantuska 1) wuxuu muujinayaa lix qeybood oo muhiim ah kuwaasoo la dhaqangelin doono si loo gaaro natiijooyinka la higsanayo.

Fiirada isbeddelku waxay soo jeedinaysaa in, hirgelinta waxqabadyada barnaamijka quudinta dugsiyada ee qaranku ay saameyn togan oo la taaban karo ku yeelan doonto dhinacyada waxbarashada: Nafaqeynta, kordhinta diiwaangelinta dugsiyada, imaanshaha, dhammaystirka heerarka waxbarashada iyo hoos-u-dhaca heerarka ardayda dugsiyada ka haraysa.

Intaas waxaa dheer, heerka bulshada degaanka, qaab-dhismeedka fekradda guud, wuxuu sawirayaa in la xoojiyo qaybgalka waalidiinta, beeralayda yar yar ee gudaha iyo ganacsatada si loo horumariyo waxsoosaarka beeraha iyo gaarsiinta dugsiyada adeegyada cuntada ee kala geddisan. Tani waxay kordhin doontaa dheefta dheellitiran oo ay carruurta dugsiyada quudan doonaan iyo dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee heer degaan.

## JAANTUSKA 1: QAABDHISMEEDKA FEKRADDA GUUD EE BQD SOOMAALIYA






*Jaantuska 1aad: Qaabdhismeedka Guud ee BQDQ*

## QEYBTA LABAAD

## JIHOOYINKA SIYAASADDA

### 2.1 HIIGSI IYO HIMILO

**Hiigsiga**

Siyaasasda Quudinta Dugsiyadu waxay hiigsanaysaa inay door muuqda ka qaadato horumarinta karaanka aadanaha, iyada oo bixinta cuntada laga dhigayo tab waxbarasho oo sahlaysa horumarinta xirfadaha laguna kobcinayo caadooyin cunto oo dheef leh, iyo taageero caafimaad oo wax ka taraysa dhismaha bulsho Soomaaliyeed oo firfircoon, caafimaad qabta, oo horumarsan.

**Himilada**

In la abaabulo dadka iyo kheyraadka (oo ay ku jiraan dawladda, bulshada rayidka ah, ganacsatada, iyo saaxiibada caalamiga ah), isla markaana lagu hawlgalo u-qareemid lagu horumarinayo barnaamijyada QD ee Soomaaliya.

In dalka oo dhan looga hirgeliyo B.Q.D waxay sugaysaa in dugsiyada si joogto ah looga bixiyo cunto isku dheellitiran, nafaqo leh oo kalajaad ah, taasoo kor u qaadaysa:

- Natiijooyinka waxbarasho
- Heerka caafimaad iyo nafaqo ee ardayda dugsiyada
- Dhaqaalaha gudaha dalka

Arrintan waxaa la gaari doonaa iyada oo oo loo marayo hannaan dawladeed oo abaabulaya dhinacyada ku lugta leh (multi-sectoral), iyo iskaashi lala yeesho hay'adaha caalamiga ah, bahwadaagta horumarineed, iyo ururrada aan dawliga ahayn.

### 2.2 BAAXADDA SIYAASADDA

Siyaasaddani waxay khusaysaa dhammaan carruurta dhigata dugsiyada waxbarashada aasaasiga ah ee Soomaaliya. Sidoo kale, siyaasaddu waxay khuseysaa DFS, Dowlad-gobaleedyada Xubnaha ka ah Federaalka iyo daneeyeyaasha aan dawliga ahayn oo ay ku jiraan hay’adaha caalamiga ah, bahwadaagta horumarineed, ururrada bulshada rayidka ah, hay’adaha aan dawliga, kuwaas oo taageera Barnaamijka Quudinta Dugsiyada (BQD), iyo sidoo kale waalidiinta. Siyaasaddu waxay taabaneysaa arrimo badan oo la xiriira waxbarashada, nafaqada, caafimaadka iyo degaanka.

### 2.3 MABAADI’DA HAGAYA SIYAASADDA

Siyaasaddani waxay ku saleysan tahay mabaadi’da aasaasiga ah ee ku xusan (QIQ) 2025–2029 ee Soomaaliya, isla markaana waafaqsan qodobbada Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo mabaadi’da guud ee xuquuqda aadanaha.

Sidoo kale, siyaasaddan waxay hiigsanaysaa in la boorriyo qiyamka aasaasiga ah ee wada-noolaanshaha sahlaya sida: is-aaminaadda, ixtiraamka, isu-damqashada, wadajirka iyo daacadnimada. Sidaas darteed, dhammaan daneeyayaasha waxaa laga filayaa in ay mabaadi'dan u hoggaansamaan kuna saleeyaan hawlahooda.

a) **Lahaanshaha iyo Hoggaaminta heerarka kala duwan ee Dowladda:** DFS iyo Dowlad-goboleedyada ayaa leh masuuliyadda koowaad ee bixinta Barnaamijyada Quudinta Dugsiyada. Sidaas darteed, Siyaasadda Quudinta Dugsiyada qorshe dhaxalgal ah ayuu uga dhigantahay

DFS, dowlad-goboleedyada, hay’adaha Qaramada Midoobay, wakiilada caalamiga ah ee kale, bahwadaagta waxbarashada, bulshada rayidka iyo daneeyayaasha kale.
Waxa la dhiirrigelinayaa lana xoojinayaa lahaanshaha iyo hoggaaminta ay wadaagaan heerarka kala duwan ee Dawladda–heer federaal, heer dowlad-goboleed, heer degmo iyo heer dugsi – iyadoo hirgelinta lagu salaynayo qaab-dhismeedyada hadda ee DFS iyo Dowlad-goboleedyada.

b) **Xaqsoorka iyo ka-qaybgal loo dhan yahay:** Qorshayaasha siyaasaddan iyo hirgelintoodu waxaa diiradda lagu saari doonaa xaqiijinta xaqsoor bulsheed iyo ka-qaybgal loo siman yahay, gaar ahaan carrurta baahiyaha gaarka qaba inta lagu gudo jiro bixinta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada.

Waxaa la tixgelin doonaa baahiyaha dhammaan carruurta dhigata dugsiyada; iyadoon la eegayn kala-duwanaanta heerarkooda nololeed, dhaqaale, jinsi, laxaad, midab, isir, taas oo si gaar ah diiradda loo saarayo bulshada nugul ama saboolka ah, hubineysana in carruurta danyarta ah, agoonta iyo carruurta nugul ay sida ugu fiican u dheefsadaan barnaamijkan.

c) **Isku-xirnaanta, Is-dhammaystirka iyo Furfurnaanta:** Siyaasadda Quudinta Dugsiyada waxaa la fulin doonaa iyada oo la tixgelinayo kala-duwanaanshaha juquraafiyeed iyo duruufaha bulsho ee dowlad-goboleedyada, waxaana lagu salayn doonaa habdhaqan kudhisan is-dhaafsi iyo is-kaabid. Dhaqangalka siyaasaddan waxaa la jaanqaadi doona siyaasadaha kale ee heer federaal iyo dowlad-goboleed ee waaxyaha kala duwan iyo taageerada bulshada degaanka.

d) **Hufnaan iyo isla-xisaabtan:** Siyaasaddan waxaa gundhig u ah nidaamyo iyo hannaan furan, iyo sidoo kale helitaanka xogta dadweynaha iyo isla-xisaabtanka bixiyeyaasha adeegyada. Dhammaan daneeyayaasha waxaa laga filayaa inay muujiyaan hufnaan iyo isla-xisaabtan marxalad kasta oo la xiriirta bixinta iyo fulinta adeegyada Quudinta Dugsiyada. Waxaa la dejin doonaa halbeeg la isku waafaqsan yahay oo la hubiyay iyo nidaam isla-xisaabtan oo qeexan si loo sugo tayada iyo hufnaanta barnaamijka.

e) **Bixinta Adeegyo Tayo iyo Waxtar Leh:** Dhammaan daneeyayaasha waxaa laga doonayaa in ay xaqiijiyaan waxku’oolnimada, hufnaanta iyo tayada adeegyada Quudinta Dugsiyada. Tayada adeegyada waxaa lagu salayn doonaa heerar iyo halbeegyo la xiriira waxbarashada, caafimaadka, nafaqada, badbaadada cuntada, biyaha iyo fayadhowrka, iyo ilaalinta degaanka.

f) **Nafaqo-kobcinta:** Siyaasaddu waxay hiigsanaysaa in la xaqiijiyo buuxinta baahiyaha nafaqo ee carruurta dhigata dugsiyada iyada oo la dhiirrigelinayo isticmaalka dalagyada dalka si waafaqsan halbeegyada nafaqada ee u degsan DFS iyo Dawlad-goboleedyada oo ay ugu horrayso helitaanka cunto dheellitiran, iyo habraacyada kaydinta, diyaarinta, iyo qaybinta quudinta dugsiyada.

g) **Go'aan-qaadasho ku dhisan Caddaymo:** Go'aamada istaraatijiyadeed ee la xiriira Quudinta Dugsiyada waxaa lagu salayn doonaa hababka la tijaabiyey ee sida wanaagsan u shaqeeyay iyo tusaalayaasha ugu wanaagsan ee gudaha iyo caalamka ee la xiriira barnaamijyada Quudinta Dugsiyada. Si taas loo xaqiijiyo, waxaa la adeegsan doonaa halbeegyo la isla gartay si loo soo xulo bulshada iyo carruurta ka faa’iideysanaya barnaamijka.

h) **Iskaashiga iyo Isuduwidda Heeraka Dawladda:** Barnaamijka Quudinta Dugsiyada waa dadaal wadajir ah oo ay fulinayaan Dawladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, sidaas darteed wuxuu ku saleysanyahay mabaadi’ iskaashi iyo isku-tiirsanaan ku dhisan, wadashaqayn iyo hannaan ay ku wada lug leeyihiin qeybaha kala duwan ee Dawladda. Waxaa

si wadajir ah looga wada shaqeyn doonaa maalgelinta, hirgelinta, iskuduwidda, kormeerka iyo ka-warbixinta barnaamijka, iyadoo la adeegsanayo hay'adaha Dawladda ee heerarka kala duwan leh, bahwadaagta horumarinta iyo daneeyayaasha la halmaala.

i) **Ka-qaybgalka iyo Lahaanshaha Bulshada Degaanka:** Bulshada degaanka waxaa si firfircoon looga qaybgelin doonaa go'aan-qaadashada iyo wax-ku-darsiga fikradaha iyo kheyraadka lagu taageerayo wax-soosaarka, suuqa, qeybinta, diyaarinta iyo tayada Quudinta Dugsiyada, gaar ahaan cuntooyinka gudaha dalka ka soo go'a.

## QEYBTA SADDEXAAD

## BAYAANNADA SIYAASADDA IYO ISTARAATIJIYADAHA

### 3.0. HORDHAC

Qaybtan waxay soo bandhigaysaa bayaannada siyaasadeed ee hagaya go'aamada iyo tallaabooyinka la qaadayo si loo gaaro yoolalka iyo ujeeddooyinka gaarka ah ee siyaasadda. Sidoo kale, waxay si cad u qeexaysaa istaraatijiyadaha ama qorsheyaasha waxqabad ee la fulinayo si loo dhaqan geliyo bayaannadaas siyaasadeed ee ku kala baahsan toddobada aag-siyaasadeed ee hoos ku xusan, iyada oo la waafajinayo yoolalka siyaasadda iyo qaab-dhismeedka aragtida guud.

a) Aag-siyaasadeedka 1aad: Kobcinta helitaanka, joogteynta, tayada iyo u sinnaanta waxbarashada aasaasiga ah

b) Aag-siyaasadeedka 2aad: Horumarinta heerka caafimaad iyo nafaqo ee carruurta dugsiyada

c) Aag-siyaasadeedka 3aad: Xoojinta barnaamijka quudinta dugsiyada ee Dal u agyada dalka

d) Aag-siyaasadeedka 4aad: Xoojinta iskaashiga iyo ka-qaybgalka bulshada deegaanka

e) Aag-siyaasadeedka 5aad: Hormarinta maamul-wanaagga, iskuduwidda dhinacyada kala duwan iyo xiriirka.

f) Aag-siyaasadeedka 6aad: Abaabulka kheyraadka iyo sameynta istaraatijiyadda maalgelinta Quudinta Dugsiyada

g) Aag-siyaasadeed 7aad: Fidinta taageero iyo gurmad ee xaaladaha degdegga ah

### 3.1 Aag-siyaasadeedka 1aad: Kobcinta Helitaanka, Joogteynta, Tayada iyo u Sinnaanta Waxbarashada Asaasiga ah.

#### 3.1.1 Hordhac

Barnaamijka Quudinta Dugsiyada wuxuu kor u qaadi doonaa ka-qaybgalka waxbarashada iyada oo la xoojinayo helitaanka, tayada iyo sinnaanta waxbarashada, islamarkaana ardayda lagu dhiirrigelinayo inay isdiiwaangeliyaan, joogteeyaan waxbarashada, una feejignaadaan hawlaha waxbarasho. Barnaamijku mustaqbalka dhow waxa lagu fidin doonaa Xarumaha Xannaanada Carruurta ee dugsiyada dadweynaha, si loo xoojiyo u diyaargarowga dugsiga ee carruurta da'doodu u dhexayso 3 ilaa 5 sano jir.

Sidoo kale, Barnaamijka quudinta dugsiyada wuxuu u jeedkiisu yahay in barnaamijka lagu baahiyo heerka dugsiga sare iyo Waxbarashada Aasaasiga ah si loo xaqiijiyo in dhammaan ardayda, gaar ahaan gabdhaha ay joogteeyaan waxbarashada, islamarkaana ay dhammaystaan heerka waxbarashada aasaasiga ah. Ujeeddada hortebinta leh waa in la dammaanad qaado cunto caafimaad leh, nafaqo leh oo ku soo beeganta waqtigeeda, si loo gaarsiiyo ubad kasta oo dugsiga tagaya.

### 3.1.2 Bayaanka Siyaasadda

Barnaamijka Quudinta Dugsiyadu waa tallaabo waxbarasho oo ay dawladdu dooneyso in ay ka hirgeliso guud ahaan dalka. Waxaana lagu dhaqangelin doonaa iskaashi lala yeesho wasaaradaha ay khusayso ee heer qaran iyo heer dowlad-goboleed ah, bahwadaagta horumarinta, dugsiyada, bulshada iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay.

### 3.1.3 Istaraatijiyadaha

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay qaadi doontaa tallaabooyinka soo socda:

1. In la xoojiyo Barnaamijka Quudinta Dugsiyada lagana dhaqangeliyo dhammaan dugsiyada waxbarashada aasaasiga ah ee dalka, iyada oo laga bilaabayo dugsiyada dadweynahadeeganada ay ku noolyihiin carruurta qoysaskoodu danyarta yihiin iyo goobaha ay isqoristoodu hooseyso si loo hubiyo in carruurta waxbaraneysa ay si maalinle ah dugsiyada uga helaan cunto nafaqaysan.

2. In la ballaariyo barnaamijka Quudinta Dugsiyada si ay u kordhaan carruurta dugsiyada ee heerarka kala duwan ee waxbarashada aasaasiga ah; oo ay ku jiraan dugsiyada barbaarinta carruurta.

3. In la sahmiyo fursado maalgelineed oo damaanad qaada nagaanshaha barnaamijka quudinta dugsiyada.

4. In la xoojiyo adeeg-bixin Quudin nafaqo leh ee Dugsiyada dadweynaha iyada oo si joogto ah loo horumarinayo karaanka iyo niyad-dhiska shaqaalaha barnaamijka quudinta dugsiyada.

5. In la dhiso ama la horumariyo hagayaasha barnaamijka Quudinta Dugsiyada ee dhammaan heerarka waxbarasho: dugsiyada barbaarinta, hoose/dhexe iyo sare.

6. In la boorriyo kala duwanaanta cuntada iyada oo la tixgelinayo shuruudaha nafaaqeeyayaalka iyo dambiisha cuntada ee degaanka.

7. In la casriyeeyo kaabayaasha dugsiyada si loo wanaajiyo kaydinta, diyaarinta, karinta, qeybinta ee cuntada, si loo daboolo baahida carruurta si loo dhanyahay.

8. In la xoojiyo wacyigelinta bulshada ee muhiimadda Barnaamijka Quudinta Dugsiyada iyo sinnaanta, si loo abuuro lahaansho bulsheed oo dhab ah oo heer dugsi iyo heer degaan ah.

9. In la awood-siiyo shaqaalaha Quudinta dugsiyada si ay u adeegsadaan tiknoolajiyadda inta lagu guda jiro diyaarinta, karinta iyo qeybinta cuntada, taasoo kor u qaadaysa tayada

adeegga laga helo laga bilaabo xarunta kaydka, jikada ilaa meesha ugu dambeysa ee u adeegidda carruurta.

10. In la horumariyo barnaamijka Quudinta Dugsiyada si uu u daboolo dhammaan baahiyaha carruurta dhigata dugsiyada hoose ee dadweynaha, ka dibna lagu baahiyo kuwa dhigta xarumaha barbaarinta iyo ardayda dugsiyada sare.

## 3.2. Aag-siyaasadeedka 2aad: Horumarinta heerka caafimaadka iyo nafaqada carruurta dugsiyada

### 3.2.1 Hordhac

Caafimaad-darrada iyo nafaqo-xumada ayaa hoos u dhiga korriimada maskaxeed ee ardayda, iyagoo sababa isbeddelo jireed, taa oo saameyneysa geeddi socodkooda waxbarasho. Barnaamijka quudinta dugsiyada wuxuu gacan ka geysanayaa in wiilasha iyo gabdhuhu dugsiyada ku nagaadaan muddo dheer, taasoo hoos u dhigaysa culayska qoysaska ee dhanka quudinta carruurta, isla markaana sare u qaadaysa heerarka imaanshaha iyo dhammaystirka waxbarashada. Dhanka caafimaadka, ardayda la ildaran nafaqo-xumada gaar ahaan yaraanta birta (iron) iyo iodine-ta, ama qaba jeermisyada deris-ku-noolka ah iyo cudurro kale, waxqabadkooda waxbarasho ayaa aad uga hooseeya marka loo eego dhiggooda ardayda caafimaadkoodu wanaagsan yahay islamarkaana nafaqo ku filan hela (Bangiga Adduunka, 2018).

Soomaaliya gudaheeda, ardayda dugsiyadu waxay la daalaadhacayaan yaraanta nafqeeyayaalka muhiimka ah sida fitamiin A, kaalshiyam, folic acid, iyo heerka hoose ee helitaanka dheef dheellitiran. Marka tan lagu daro cudurrada deriskunoolka ah sida gooryaanka, waxay si weyn u dhantaalaan awoodda waxbarasho ee ardayda (HCA iyo DFS, 2019). Sidaas awgeed, siyaasaddani waxay soo jeedinaysaa in la shaqaaleeyo hawlwadeen ku takhasusay nafaqada kaas oo si dhow ula shaqeynaya maamulka dugsiyada, mas’uuliyiinta degmooyinka, waalidiinta iyo daneeyayaasha kale si loo gaaro yoolalka siyaasaddan.

### 3.2.2 Bayaanka Siyaasadda

Helitaanka cunto caafimaad iyo nafaqo leh gudaha dugsiyada ayaa ka mid ah hortebinta siyaasadeed ee nidaamka waxbarashada. Wasaaradda Waxbarashada waxaa ka go'an inay kordhiso helitaanka cunto loo siman yahay oo tayo leh, iyadoo loo marayo iskaashi iyo wadashaqayn dhex maraysa dawladda iyo bulshada.

### 3.2.3 Istaraatijiyadaha

1. Waxaa la dejinayaa halbeegyo asaasi ah oo lagu qiimeeyo heerka nafaqo ee carruurta dhigata dugsiyada si loo hubiyo kaabitaanka fitamiinnada iyo macdanta yaryar.

2. Waxaa la xoojinayaa karaanka shaqaalaha dugsiyada xagga diyaarinta, karinta, iyo qeybinta cuntada ardayda, si loo hubiyo in la bixiyo cunto nafaqo leh.

3. Waxaa la boorrinayaa noocaynta cuntooyinka la siiyo ardayda dugsiyada iyada oo la adeegsanayo dalaga cuntada ee degaanka laga helo.

4. Waxaa dugsiyada lagu bixin doonaa waxbarasho la xiriirta caafimaadka, nafaqada iyo nadaafadda shakhsiyeed, dheef dheellitiran, fayadhowrka guud ee dugsiga, waxbarashada caafimaadka, iyo wacyigelinta la xiriirta waxyaabaha maanka dooriya.

5. Waxaa la horumarinayaa tayada nafaqada iyo badbaadada cuntada quudinta dugsiyada iyada oo la adeegsanayo farsamooyin lagu xoojiyo cuntada si waafaqsan siyaasadda qaran ee nafaqada.

6. Waxaa la xoojinayaa nadaafadda dugsiyada, iyada oo diiradda la saarayo helitaanka biyo nadiif ah, fayadhowrka iyo nadaafadda si loo ilaaliyo caabuqyada ka dhasha jeermisyada iyo yaraanta fitamiinnada.

7. Waxaa la dhiirrigelinayaa wacyigelinta iyo waxbarashada ku saabsan kahortagga cudurrada iyo xakameyntooda, si loo helo deegaan caafimaaqaba kaas oo ay ka faa'iideystaan ardayda, macallimiinta iyo bulshada dugsiga guud ahaan.

## 3.3. Aag-siyaaasadeedka 3-aad: Xoojinta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada

### 3.3.1: Hordhac

Barnaamijyada Quudinta Dugsiyadu wuxuu abuurayaa dalab cunto taas oo mudnaanta siinayso beeraleyda degaanka kuwaas oo isticmaala habab waxsoosaar oo waara kuna saleysan (*agroecological practices*). Ujeeddadu waa in la daboolo baahiyaha nafaqeed ee carruurta dugsiyada, iyada oo la adeegsanayo hab-beereedyo dhiirrigeliya: Caawinaya noolaha, adkaysiga degaanka, iyo wax soosaarka cunto nafaqo leh, iyada oo bulshadu aanay ku tiirsanayn cunto lasoo dhoofiyey.

### 3.3.2 Bayaanka Siyaasadda

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay dhiirragelinaysaa xiriirka beeraleyda iyo dugsiyada si loo helo iskaashi lagu horumarinayo wax-soosaarka iyo isticmaalka dalagyada dalka.

### 3.3.3 Istiraatiijiyadaha

1. Waxaa dugsiyada lagu dhiirrigelinayaa in ay beeralayda yaryar ka iibsadaan wax-soosaarka beerahooda, si Barnaamijka Quudinta Dugsiyada u noqdo mid ku tiirsan dalagyada dalka.
2. Dugsiyada waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay yeeshaan beero wax soosaar oo kaabaya Quudinta Dugsiyada.
3. Waxaa la xoojinayaa awoodda iyo karaanka beeraleyda yaryar si loo horumariyo wax-soosaarka cuntada gudaha, islamarkaana beeraleydu ay si waxku'ool ah uga qayb-qaataan Barnaamijka Quudinta Dugsiyada.
4. Waxaa la xoojinayaa awwoodda dugsiyada si ay u adeegsadaan ilo kala duwan oo laga heli karo tamarta lagu kariyo cuntada, si loo ilaaliyo badqabka deegaanka isla markaana loo yareeyo kharashaadka.
5. Waxaa la dhiirrigelinayaa barnaamijyada beeraynta dugsiyada iyo in ardaydu si iskood ah uga qayb qaataan hawlaha la xiriira beerta dugsiga.
6. Waxaa la dhiirrigelinayaa xeeladaha lagu yareynayo sabbaynta qiimaha la iibiyo badeecadaha cuntada.
7. Waxaa la xoojinayaa adeegsiga tiknoolajiyadda ee beeraleyda degaanka iyo hirgeliyeyaasha barnaamijka, si loo horumariyo wax-soosaarka iyo tayada cuntada.

## 3.4: Aag-siyaaasadeedka 4-aad: Xoojinta Iskaashiga iyo Ka-qaybgalka Bulshada Degaanka

### 3.4.1: Hordhac

Siyaasaddu waxay ku hiranaysaa in iskaashiga iyo ka-qaybgalka firfircoon ee bulshada degaanku ay udub-dhexaad u yihiin miro-dhalka, isla-xisaabtanka iyo taabbagalka Barnaamijka quudinta dugsiyada. Inkastoo horay loo sameeyay dadaallo badan oo lagu dardargelinayo ka-qaybgalka bulshada ee barnaamijka, haddana isbeddel la taaban karo lagama gaarin.

Siyaasaddu waxay hiigsanaysaa in la xoojiyo ka-qaybgalka bulshada si loo gaaro lahaansho, is-dhammaystir iyo nagaansho uu ku tillaabsado Barnaamijka Quudinta Dugsiyada. Sidoo kale, iyada oo la tixgelinayo kheyraadka cayiman ee la haysto, waxaa muhiim ah in la raadiyo iskaashi cusub oo lala yeesho bulshada deegaanka, , si ay u taageeraan Barnaamijka Quudinta Dugsiyada heer bulsho, heer dawlad-goboleed iyo heer qaran.

Hadafka mudnaanta leh ee aag-siyaasadadeedkan waa in la xoojiyo lahaanshaha, waaritaanka iyo isla-xisaabtanka heerka hoose iyadoo loo marayo ka-qaybgalka tooska ah ee bulshada, sii-adkaynta iskaashiyadii horay u jiray, iyo in xiriirro cusub oo iskaashi laga hirgaliyo meelaha ay lamahuraanka tahay in la horumariyo bixinta adeegyada Quudinta Dugsiyada.

### 3.4.2 BAYAANKA SIYAASADDA

Waxaa la dhiirrigelinaya ka qaybgalka bulshada ee qorsheynta, naqshadeynta iyo hirgelinta barnaamijyada quudinta dugsiyada, iyada oo la qabanayo kulammo bulsho oo ka qabsooma gudaha dugsiyada, halkaas oo waalidiinta looga warbixiyo guulaha barnaamijka, loogana dhageysto aragtidooda ku aaddan sida ugu wanaagsan ee ay dugsiyadu ugu adeegi karaan carruurtooda.

### 3.4.3 ISTIRATIIJIYADAHA

1. Waxaa la xoojinayaa awoodda guddiga waxbarashada ee bulshada si ay iyaguna u hawl-geliyaan bulshada degaanka, uguna dhiirrigeliyaan in ay si buuxda uga qayb-qaataan barnaamijka quudinta dugsiyada.
2. Waxaa lagu dhiirrigelinayaa maamulka dugsiyada iyo bulshada degaanka in dugsiyadu noqdaan deegaan ku habboon nolosha iyo waxbarashada ardayda, iyada oo diiradda la saarayo bixinta cunto caafimaad leh dheellitiranna, xaqiijinta helitaanka biyo nadiif ah, iyo xoojinta kaabayaasha kale ee lagama-maarmaanka u ah barnaamijka quudinta dugsiyada.
3. Waxaa la qabanayaa aqoon-isweydaarsiyo iyo madallo bulsho si kor loogu qaado wacyiga ku saabsan doorka iyo masuuliyadaha ay bulshada degaanku ku leedahay Barnaamijka quudinta dugsiyada.
4. Waxaa la dhisayaa jawaabcelin joogto ah oo ay bulshada ku wada xiriiri karaan mas'uuliyiinta iyo hay'adaha ka shaqeeya barnaamijka quudinta dugsiyada.

### 3.5. Aag-siyaaasadeedka 5-aad: Horumarinta maamul-wanaagga, iskuduwidda dhinacyada kala duwan iyo warbixinta

#### 3.5.1: Hordhac

Si loogu guuleysto yoolalka siyaasaddan waxa loo baahan yahay hab-maamul dhinacyo kala duwan oo ku dhisan isla xisaabtan iyo hufnaan. Siyaasaddu waxay soo bandhigeysaa aragti ah in la yagleelo hannaan maamul iyo isku-duwid oo ay ku midaysan yihiin hay'adaha DFS iyo Dowlad-goboleedyada, iyo waliba sidoo kale daneeyayaasha ka kala socda qeybaha waxbarashada, caafimaadka, nafaqada, beeraha, qorsheynta, maaliyadda, deegaanka iyo illaalinta bulshada. Sidaa daraadeed, dhaqangelinta Siyaasadda Quudinta Dugsiyada iyo hirgelinta barnaamij qaran oo quudin dugsiyeed waxay ku xirantahay helidda qaab-dhismeed maamul oo hufan.

#### 3.5.2 BAYAANKA SIYAASADDA

Dowladdu waxay qaadaysaa tallaabooyin si rasmi ah oo lagu qaramaynayo quudinta dugsiyada, iyada oo la hubinayo in barnaamijku ku lammaansamo jadwalka sanadlaha ah ee dugsiyada iyo manhajka qaranka, si dhammaan carruurta dhigata dugsiyada ay u hantaan fursado ay ku helaan cunto caafimaad leh oo nafaqaysan, taasoo kor u qaadaysa korriimadooda iyo u-diyaargarowgooda waxbarasho. Tani waxay meesha ka saareysaa saboolnimada jiilba-jiil ee la kala dhaxlo, iyada oo carruurta laga taageerayo dhinacyada caafimaadka, waxbarashada, iyo fursadaha nolosha ee mustaqbalka.

#### 3.5.3 ISTARAATIJIYADAHA

1. Xoojinta qaabdhismeed ka kooban dhinacyo kala duwan kaas oo keenaya wadashaqayn dhex marta heerarka kala duwan ee dawladda si hiigsiga loogu beddelo waxqabad.
2. Waxaa la sii xoojinayaa maamul-hawleedka iyo habraacyada agaasinka ee hadda jira si ay uga tarjumaan habka waaxyaha kala duwan isku kaashanayaan.
3. Waxaa la dhisayaa hannaan qeexaya ka-qaybgalka daneeyayaasha, doorkooda iyo masuuliyadooda, si uu ugu waafaqsanaado waajibaadka sharciyeed ee heerarka kala duwan ee Dawladda, wasaaradaha ay khusayso, iyo hay'adaha kale ee muhiimka ah.
4. Waxaa la xoojinayaa ololeyaasha wacyigelinta iyo u-doodista barnaamijka quudinta dugsiyada, iyada oo la adeegsanayo madallada iskuduwid ee hadda jira oo ka kooban guddiyo kala duwan, sida ururada bulshada, waxbarashada, sugnaanta cuntada, iyo nafaqada.
5. Waxaa la xoojinayaa hirgelinta nidaam mideysan oo maaraynta xogta iyo warbixinta, si loo soo ururiyo, falanqeeyo, kaydiyo loona soo bandhigo xogta la xiriirta Barnaamijka quudinta dugsiyada.
6. Xoojinta qaab-dhismeedyada iskuduwidda qeybaha kala duwan, si loo tiigsado hufnaan maamul oo ka hanaqaada dhammaan heerarka Dawladda ee ku hawlan barnaamijka quudinta dugsiyada.
7. Waxaa la dhisayaa tabo adag oo iskaashi iyo wada-shaqeyn kuwaas oo lala yeesho dhammaan daneeyayaasha ku hawlan bixinta iyo taageerada barnaamijka quudinta dugsiyada heer federaal iyo heer dawlad-goboleed.

### 3.6: Aag-siyaasadeedka 6-aad: Abaabulka kheyraadka iyo Istaraatijiyadda Maalgelinta QD

#### 3.6.1: Hordhac

Qoondeynta kheyraadka waa masuuliyad ay leedahay dowladda dhexe, si loo horumariyo barnaamijka cuntooyinka dugsiyada ee heer qaran. Carruurta oo si wanaagsan loo nafaqeeyo waa mid horseedeysa inay wax bartaan oo ay koraan, si ay u gaaraan karaankooda oo buuxa.Waqtigan, barnaamijka waxaa maalgeliya hay'ado yar sida WFP iyadoo ay yar tahay maalgelinta dowladda iyo bulshada gudaha. Siyaasaddu waxay hiigsanaysaa in la kordhiyo ka qaybgalka dowladda ee maalgelinta barnaamijka iyadoo loo marayo ilaha gudaha iyo ka qaybgalka ganacsiga gaarka loo leeyahay.

#### 3.6.2 Bayaanka Siyaasadda

Dowladda Soomaaliya waxey qaadan doontaa door ah diyaarinta iyo dhaqangelinta hab maalgelineed oo suurtagelinaya hirgelinta joogtada ah ee Barnaamijka Quudinta Dugsiyada, si uu ula jaanqaado himilooyinka horumarka qaranka ee Soomaaliya. Sidoo kale, dowladda ayaa kaalin hoggaamineed ka qaadanaysa hirgelinta hab-dhaqan ku saleysan lahaansho buuxda iyo u-jeeddo cad oo ku wajahan abaabulka taageerada dhaqaale ee barnaamijka.

#### 3.6.3 Istaraatijiyadaha

1. Qoondaynta taageerada dhaqaale ee gudaha ka timaad ee loogu talaggalay barnaamijka quudinta dugsiyada, iyada oo lagu darayo miisaaniyadda qaranka, si sare loogu qaado oddoroska iyo sii-jiritaanka barnaamijka.
2. In la sameeyo falanqeyn ku saabsan baaxadda dhaqaale ee Dawladda si loo sahmiyo siyaabo hal-abuur leh oo loo maalgelin karo barnaamijka quudinta dugsiyada.
3. In lala shaqeeyo HCA si loo sameeyo falanqeyn suuqeed iyo dib-u-eegis ku aaddan halbeegga dambiisha cuntooyinka dhawrkii sanaba hal mar.
4. Waxaa la dhisayaa lana dhiirrigelinayaa istaraatijiyad deeq-ururin ah oo dalka iyo dibadda laga fuliyo si loo taageero hirgelinta Siyaasadda ee guud ahaan dalka.
5. In Barnaamijka Quudinta Dugsiyada lagu daro Qorshayaasha Istaraatijiga ah ee Qaybta Waxbarashada, si muhiimad gaar ah loo siiyo barnaamijka marka la diyaarinayo qorshayaasha maaliyadeed ee lagu maalgelinayo waxbarashada.
6. In la dhiirrigeliyo ka-qaybgalka bulshada ee qaaraanka quudinta dugsiyada, lana hawlgeliyo ganacsiga gaarka loo leeyahay iyada oo loo marayo Iskaashiga Dawladda iyo Ganacsiyada Gaarka loo leeyahay, si loo ballaariyo loona waariyo barnaamijka.
7. In lala shaqeeyo hindisaha maalgelinta waarta ee caafimaadka iyo nafaqada dugsiyada, si taageero farsamo loogu helo falanqaynta hababka maalgelinta, caqabadaha jira, iyo sidoo kale istaraatijiyadaha maalgelinta, loona diyaariyo qorshe maalgelin dhowr-sanadle ah oo barnaamijka quudinta dugsiyada ee dalka ka dhiga mid waara.

## 3.7. Aagga-siyaasadeedka 7-aad: Taageero Gurmad ee xaaladaha degdegga ah

### 3.7.1 Hordhac

Barnaamijka Quudinta Dugsiyada wuxuu qeyb ka noqonayaa fidinta gurmad bulsho xilliyada xaaladaha degdegga ah ee Soomaaliya. Waxa uu si gaar ah uga qeyb qaadanayaa yareynta shaqaalaysiinta iyo askaraynta carruurta, iyo hoos-u-dhigidda guurka iyo dhalmada gabdhaha ee xilliga hore ah.

Sidoo kale, barnaamijka quudinta dugsiyada wuxuu hiil dhaqaale oo la isku hallayn karo u noqday qoysaska aadka ugu nugul, isagoo ka caawiyay yareynta kharashaadka uga bixi jiray waxbarashada iyo cuntada. Barnaamijyada quudinta dugsiyadu waxay u hawlgalaan tabta goobo si fudud loo haleeli karo oo bixiya baxnaano bulsho oo dhanka caafimaadka dhimirka ah, iyo dhammaan adeegyada ku saabsan isgaarsiinta isbeddelka dhaqan-bulsheed.

Ujeedada ugu weyn ee aag-siyaasadeeddan waa in la dammaanad qaado sii wadidda waxbarashada iyo hagaajinta nafaqada, caafimaadka iyo badqabka maskaxeed ee ardayda ee xaaladaha degdegga ah

### 3.7.3. Bayaanka Siyaasadda

Hubinta barnaamij badbaado bulsheed oo xooggan oo ilaalinaya sharafta, yaraynaya faqriga, oona fududeynaya helidda taageero iyo gurmad gaar ahaan dhanka cuntada ee qoysaska xilliyada baahida.

### 3.7.4 Istaraatijiyadaha

1) In la hirgeliyo istaraatijiyadda quudinta dugsiyada ee cusub ee 2025, taas oo si faahfaahsan u qeexaysa istaraatijiyadda xulashada dugsiyada iyo faragelinta barnaamijka quudinta xilliyada xaaladaha degdegga ah jiraan, iyadoo la waafajinayo siyaasadda ilaalinta bulshada.
2) Waxaa la xoojinayaa lana ballaarinayaa bixinta taageerada dhaqaale ee tooska ah (*income transfer)* ee loo fidiyo qoysaska nugul ee leh carruur dhigata dugsiyada, iyadoo la adeegsanayo habab hal-abuur leh sida: saami-cunto oo guriga loo qaato, lacagaynta (*cash transfer*), ama hannaano hindisaad oo ah dhufso oo dhaqaaq (*grab and go*), oo dhiirrigelinaya fursadaha waxbarasho inta lagu gudo jiro xaaladaha degdegga ah.
3) In la helo lana bixiyo cunto nafaqo leh iyo farriimo wacyigelin oo taabanaya isbeddelka arrimaha jinsiga, iyadoo la siinayo ardayda taageero nafsi ah, la-talin iyo hagitaan, iyo baxnaanooyin bulsheed oo kale marka ay jiraan xaaladaha degdegga ah.
4) Waxaa la xoojinayaa istaraatijiyadda isgaarsiinta isbeddelka dhaqan-bulsheed inta lagu gudo jiro xaaladaha degdegga ah.
5) Waxaa la xoojinayaa xeeladaha mudnaanta siinaya in bixinta quudinta dusgiyada loo adeegsado gacan badbaado oo bulshada la siiyo si loo tabantaabiyo carruurta nugul iyo qoysaskooda marka ay jiraan xaalado degdeg ah iyadoo xeeladahan la waafaqsiinayo siyaasadda ilaalinta bulshada.
6) Waxaa la xoojinayaa kaabayaasha kale ee lamahuraanka u ah siyaasadda quudinta dugsiyada sida yaraynta tacaddiyada iyo bixinta baxnaano bulsheed.

## QEYBTA AFARAAD

## HIRGELINTA IYO QAABDHISMEEDKA ISKUDUWIDDA

### 4.0 Hordhac

Qeybtani waxay qeexaysaa qodobbada siyaasadeed ee la xiriira iskuduwidda iyo hawlgalka maamulka heer qaran iyo heer maamul goboleed iyo sidoo kale doorka iyo masuuliyadaha ay leeyihiin daneeyayaasha kala duwan ee ku lugta leh Barnaamijka.

Siyaasaddu waxay qaadanaysaa hannaan hoos u daadejin ah oo dhinacyo badani iska kaashanayaan, kaas oo ay ku lug leeyihiin dhammaan heerarka dawladda si loo fududeeyo hirgelinta siyaasadda. Hirgelinta siyaasaddan waxaa si wadajir ah u fulin doona Dawladda federaalka, dowlad-goboleedyada iyo hay'adaha horumarinta. Siyaasaddu waxay aragti ahaan ku saleysan tahay in la helo iskaashi dhow iyo iskuduwid waxku'ool ah oo ay sameeyaan dhammaan daneeyayaasha ka qayb qaadanaya hirgelinta heerarka kala duwan ee siyaasadda.

### 4.1 Hab-dhismeedka Hay'adaha

Barnaamijka quudinta dugsiyada ee nafaqo-kobcintu wuxuu u baahan doonaa inay ka qeyb qaataan hay'adaha iyo daneeyayaasha kala duwan ee ka kala socda qeybaha kala duwan, si la isugu biiriyo aqoonta, khibradda iyo agabka qorsheynta iyo hirgelinta barnaamijka. Waxaa intaas soo raaca oo lagama maarmaan ah in quudinta dugsiyada lagu daro dhammaan heerarka siyaasadaha iyo qaab-dhismeedyada waaxyaha, si loo unko iskaashi hufan oo dhex mara heer federaal iyo heer dowlad goboleed iyada oo wasaaradaha, hay'adaha iyo waaxyaha labada heer ee dowladdu ay muujiyaan daneynta iyo muhiimadda quudinta dugsiyada.

Iskuduwidda dhinacyada kala duwani waxay suurtagelinaysaa dhisidda khibrad farsamo iyo awood hay'adeed, iyo sidoo kale isgaarsiin habsami leh oo ka duulaysa tallaabooyin mideysan, qorsheynta yoolalka, iyo cabbiraadda waxqabadka iyada oo la adeegsanayo tilmaamayaal iyo natiijooyin la isla gartay. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in la helo koox farsamo oo shaqaynaysa, lagana soo xulay dhammaan hay'adaha Dawladda ee siyaasadda ku lugta leh iyo bahwadaagta horumarinta, si loo xoojiyo iskuduwidda dhammaan heerarka kala duwan.

Qaybtani waxay faahfaahinaysaa qaab-dhismeedka hay'adeed ee hagi doona maamulka iyo iskudubaridka siyaasadda. Siyaasaddan waxaa lagu hirgelin doonaa gudaha qaab-dhismeedyada maamulka ee jira ee dawladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, waxaana la abuuri doonaa kooxo farsamo oo ka kooban hay'adaha ay khusayso, kuwaas oo ka shaqayndoona fududeynta iskaashiga.

Qaabdhismeedkan ayaa si kooban hoos loogu sharraxay:

a) **Guddiga Isku-dhafka Hay'daha ee Jihaynta Quudinta Dugsiyada** ayaa laga dhisi doonaa heer federaal si loo gaaro go'aamada ugu dambeeya ee maamulka iyo qoondaynta kheyraadka. Guddigan waxaa si wadajir ah u guddoomin doona Wasiirka Waxbarashada Federaalka, Wasiirka Beeraha, Wasiirka Caafimaadka, iyo Wakiilada Hay'adaha Caalamiga ah oo metelaysa bahwadaagta deeq-bixiyeyaasha.

Xubnaha guddigan waxaa ka mid ah: Wasiirrada Waxbarashada ama wakiilladooda, dowlad-goboleedyada, Agaasimaasha Guud ee Waxbarashada dawladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada, wakiillo ka socda bahwadaagta horumarinta, wasiirka ama wakiillo ka socda waaxyaha caafimaadka, beeraha, arrimaha bini'aadannimada iyo maaliyadda; wakiillo ka socda hay'adaha aan dawliga ahayn ee caalamiga ah (INGOs), iyo wakiillo ka tirsan kooxaha sugnaanta cuntada iyo waxbarashada.

Hawlaha uu qaban doono Guddigu waxaa ka mid ah:

- Go'aan-qaadasho istaraatiji ah
- Abaabulka/maalgelinta kheyraadka
- U-qareemidda BQD oo heer caalami ah
- U-qareemidda BQD oo heer qaran ah
- Iskuxiridda qeybaha kala duwan ee dawladda
- Kobcinta iskaashiga iyo wada-shaqeynta

b) **Guddiga Quudinta Dugsiyada ee Heer Gobol** ayaa laga dhisi doonaa dowlad-goboleed kasta. Guddigan waxaa wada guddoomin doona wasiirrada waxbarashada ee dowlad-goboleedyada ama wiikaladooda iyada oo uu guddigu noqonayo hay'adda hormuudka ah ee taageerta Barnaamijka quudinta ee heer gobol.
Hawlaha Gudigan waxaa ka mid ah:

- Iskuxirka Kooxda Farsamada Wasaaradaha kala duwan ee Barnaamijka Quudinta Dugsiyada.
- Go'aan-qaadasho istaraatiji oo barnaamijka ku saabsan
- Kheyraadka kaabayaasha ah/qoondaynta maaliyadda Dawlad-goboleedka
- U-qareemidda barnaamijka ee gudaha gobolka
- Kobcinta iskaashiga iyo wadashaqaynta gobolka.

c) **Guddiga Quudinta Dugsiyada Heer Degmo:** Guddigan ayaa laga dhisi doonaa heer degmo si uu ula socdo una kormeero hirgelinta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada ee ka socda degmo kasta oo uu ka hawlgalo. Xubnaha Guddigan waxaa ka mid noqon doona: Sarkaalka Waxbarashada Degmada oo noqon doona guddoomiyaha fadhiyada; wakiillo ka socda wasaaradaha Beeraha, Caafimaadka, iyo Arrimaha Bani'aadannimada; wakiillo ka socda hay'adaha maxalliga ah (NGO-yada), Ururrada Bulshada Degaanka, iyo maamulka Dawladda hoose.
Hawlaha guddigu qabanayo waxaa ka mid ah:

- Iskuxirka bulshada/dugsiyada iyo Guddiga
- Taageerada dugsiyada degmada

- Hubintada adeegyada quudinta dugsiyada
- Cayimidda kooxaha nugu/dadka adeegga laga reebo.
- Aqoonsiga dugsiyada iyo ardayada la beegsanayo ee taageer QD u baahan.
- Kormeerka iyo qiimeynta natiijada/saamaynta degmada
- Xog-ururinta iyo diyaarinta warbixinnada
- Iskuxirka kooxaha heer degmo ee daryeelka bulshada, nafaqada iyo sugnaanta cuntada.

d) **Guddiga Quudinta Dugsiyada:** Guddigan wuxuu noqonayaa guddi-hoosaad ka tirsan Gudiga waxbarashada ee bulshada ee ku sugan dugsi kasta. Guddiga quudinta dugsiyada waxaa hoggaamin doona maamulaha dugsiga, wuxuuna ka koobnaan doonaa ugu yaraan saddex xubnood, ugu badnaanna shan xubnood. Xubnaha guddiga quudinta dugsiga waxaa soo magacaabi doona guddiga quudinta dugsiyada Heer Degmo, waxaana ansixin doona guddiga quudinta dugsiyada heer gobol. Xubnaha GQD waxaa laga soo xuli doonaa dadka ugu daacadsan uguna kartida badan ee laga heli karo degaanka. Guddigu wuxuu yeelan doonaa xilal kala duwan sida: guddoomiye, keyd-haye(storekeeper), iyo hantidhowre (treasurer). Guddigu wuxuu u kulmi doonaa toddobaadle ama mar kasta oo baahi timaaddo. Hawlaha Guddiga waxaa ka mid ah:


- Korjoogteynta maalinlaha ee dhammaan hawlaha quudinta dugsiyada
- ka hawlaha daneeyayaasha kala duwan
- Tayadhawrka adeegyada quudinta dugsiyada
- Iskuxirka bulshada degaanka, beeraleyda iyo ganacsatada muhiimka ah.
- Kormeerka waxsoo-iibsiga, keydinta, diyaarinta, karinta iyo qeybinta cuntada.
- Ururinta xogta heer dugsi iyadoo la adeegsanayo tiknoolojiyadda la heli karo loona gudbiyo heer degmo.

e) **Waaxda Quudinta Dugsiyada (WQD)** ee hadda dhex deggan WWH&TS ee Dawladda federaalka ah, waa la xoojin doonaa lana casriyeyn doonaa si uu u hoggaamiyo dadaalka ka dhanka ah gaajada iyo nafaqo-xumida carruurta dhigata dugsiyada guud ahaan dalka. Waaxda la casriyeeyay ee Quudinta Dugsiyada wuxuu noqon doonaa guddoomiyaha Kooxda Shaqada ee Wasaaradaha BQDW taasoo ah koox farsamo oo isugu jirta hay'ado badan oo ay wehliyaan wakiillo ka kala socda wasaaradaha ku lugta leh siyaasadda ee Dawladda federaalka.

**Hawlaha WQD:**

- Hirgelinta go'aamada GIHJQD
- Kormeerka maalinlaha ee hirgelinta SQDQ ee heer federaal
- Iskuduwidda daneeyayaasha heer federaal
- Hubinta taageerada guud ee farsamo ee lagu fulinayo hawlaha barnaamijka
- Bixinta hagayaal farsamo oo la xiriira: Soo-iibsiga cuntada, kormeerka iyo qiimeynta, cilmi-baarista, xog-uruurinta iyo falanqeynta siyaasadda, xakamaynta gudaha, maamulka maaliyadda iyo warbixinta, qorsheynta iyo miisaaniyad dejinta, isku-xirka iyo isgaarsiinta daneeyayaasha, saamileyda iyo dadweynaha kala duwan.

### Jaantuska 2aad: Qaabdhismeedka iskuduwidda Dhinacyada Badan



### Jaantuska 3aad: Qaabdhismeedka Maamulka iyo Maareynta QD

| HEERKA | QAABDHISMEEDKA ISKUDUWIDDA | HAWLAHA MUHIIMKA AH | HABKA ISKUDU WIDDA |
|---|---|---|---|
| HEER FEDERAAL | WWH&TS<br>QM, Daneeyayaasha, GGLL<br>Wasaaradaha kale ee qeybta ka ah<br>GIHJQD | ∞ Go'aan gaarista istaraatijiga ah.<br>∞ Abaabulka kheyraadka/maalgelinta.<br>∞ U-qareemidda iyo iskaashiga caalamiga ah<br>∞ U-qareemis heer qaran ah<br>∞ Isku-xiriirinta qeybaha dawladda.<br>∞ K&Q heer qaran ah<br>∞ Unkidda cadeymaha iyo isgaarsiinta<br>∞ Horumarinta iyo dib-u-eegista siyaasadda<br>∞ Isku-xiridda daryeelka bulshada, nafaqada iyo sugnaanta cuntada | **GIHJQD** Wuxuu kulan yeeshaa saddexdii biloodba mar<br><br>**KFW-BQDW** Waxay kulan yeelataa labadii biloodba mar |
| HEER DAWLAD-GOBOLEED | WSAARADDA WAXBARASHADA<br>QM, daneeyayaasha, iyo ggll<br>Wasaaradaha kale ee DG ee qeybta ka ah<br>GQDHG | ∞ Iskuxirka GJIH&QD<br>∞ Go'aan-gaaris istaraatiji ah oo heer Dawlad-goboleed ah<br>∞ Abaabulka Kheyraadka lamahuraanka u ah maamul-gobaleedka.<br>∞ U-qareemid heer dawlad-goboleed ah<br>∞ Iskaashiga iyo wadashaqeynta gobolka.<br>∞ Kormeeridda hirgelinta barnaamijka<br>∞ La socoshada iyo ururinta xogta | **GQDHG** Wuxuu u kulmaa bille |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | | ∞ Ka-warbixinta heerka waxqabadka barnaamijka<br>∞ Isku-xiridda daryeelka bulshada, nafaqada iyo sugnaanta cuntada | |
| HEERKA DAWLADDA HOOSE | WWH&TS iyo Wasaarada kale ee qeybta ka ah<br>QM / DANEEYAYAASHA/UDA/ UD/ GGLL<br>→ GQDHD | ∞ Iskuxiriirinta<br>∞ Tayadhowrka<br>∞ Cayimidda dadka nugul/kooxaha adeegga laga reebo<br>∞ Aqoonsiga dugsiyada iyo ardayda bartilmaameedka ah<br>∞ Ururinta xogta iyo ka-warbixinta<br>∞ Taagero u-fidinta kormeerka dugsiyada<br>∞ Iskuxiriirinta maamulka degaanka<br>∞ Dhawrista degaanka<br>∞ Taakulaynta waxsoosaarka beeraha | **GQDHD**<br>∞ Wuxuu kulmaa bil kasta<br>∞ Wuxuu hayaa diiwaanka kulamada |
| HEER DUGSI/DEGAAN | GMD/GWB<br>Ardyada/waalidiinta Iyo bulshada<br>→ GMD | ∞ Korjoogteynta maalinlaha ah ee hawlaha quudinta dugsiyada<br>∞ Iskuduwidda daneeyayaasha kala duwan ee dugsiyada<br>∞ Tayadhawrka quudinta dugsiyada<br>∞ Iskuxiriirinta bulshada degaanka, beeraleyda iyo ganacsatada<br>∞ Sahminta suuqa ee la xiriirta badeecooyinka iyo cuntooyinka<br>∞ Qoondeynta kheyraadka kabayaasha ah<br>∞ Taageerada beeraleyda | **GMD**<br>∞ Wuxuu kulmaa toddobaad kasta<br>∞ Wuxuu hayaa diiwaanka kulamada |

### 4.2 Doorarka iyo Mas'uuliyadaha Saamilayda

Hirgelinta siyaasaddan waxaa hormuud u ah Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha wakiilka ugu ah Federaalka; Waaxyaha iyo Hay'adaha Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka; bahwadaagta horumarinta oo ay ku jiraan hay'adaha Qaramada Midoobay; Ururada Bulshada Rayidka ah; Guddiga Waxbarashada Bulshada; maamullada dugsiyada; macallimiinta; waalidiinta iyo guud ahaan bulshada.

| Hay'adda | Doorka iyo Mas'uuliyadda |
|---|---|
| **Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliin Sare ee DFS** | • **Arrimaha Maamulka iyo Farsamada oo uu hagayo GIHJQD**<br>• Xafiiska Xoghaynta ee GIHJQD<br>• Hoggaaminta Aag-siyaasadeedka Koowaad ee: hagaajinta helitaanka, joogtaynta, tayada iyo xaqsoorka Waxbarashada hoose ee heer federaal<br>• Dib-u-eegista iyo horumarinta Siyaasadda Quudinta Dugsiyada ee Qaranka<br>• Xiriirinta bahwadaagta horumarinta iyo deeqbixiyaasha<br>• Horumarinta habraacyada nidaamka adeegyada qaranka<br>• Kormeerka iyo qiimaynta waxqabad ee heer qaran<br>• Taageeridda kor u qaadista kartida xirfadeed ee xubnaha dowlad-goboleedyada u qaabilsan BQD.<br>• Xiriirinta Baarlamaanka Federaalka iyo hay'adaha kale si loo hubiyo habsami-u-socodka qaab-dhismeedyada sharciga.<br>• Hirgelinta xeelado loogu talaggalay wadashaqaynta xafiisyada kala duwan iyo bahwadaagta.<br>• Karaandhis ku saabsan maareynta iyo bixinta BQD |
| **Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee DFS** | • **Hoggaaminta aag-siyaasadeedka 2-aad ee horumarinta caafimaadka iyo nafaqada carruurta dugsiyada**<br>• Taageero farsamo iyo mid maaliyadeed oo loo fidiyo hawlaha caafimaad iyo nafaqo ee ka socda dugsiyada.<br>• Karaan-dhis ku saabsan Biyaha, Fayadhawrka iyo Nadaafadda (BFN) oo la siiyo saamilayda qaybta ka ah barnaamijka.<br>• Abuuridda halbeegyo nafaqeeyayaal oo loogu talaggalay carruurta dugsiyadda ku jirta.<br>• Bixinta habraacyo ku saabsan quudinta dugsiyada ee nafaqo-kobcinta, tayadhawrka cuntada iyo tilmaamaha badbaadada.<br>• Samaynta habraacyo la xiriira macdanta yaryar iyo faytimiinnada kaalmaatigga ah.<br>• Ka taageeridda dugsiyada hubinta in shaqaalaha qaybta cunto-bixintu buuxiyeen shuruudaha caafimaad. |

| | |
|---|---|
| | • Hawlwadeennada qaybta cunto-bixinta ee dugsiyada oo lagula taliyo in ay maraan is-hubin caafimaad. |
| **Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ee DFS** | • **Hoggaaminta aag-siyaasadeedka 3-aad ee mataanaynta waxsoosaarka cuntada dalka iyo BQDW.**<br>• In Barnaamijka Quudinta Dugsiyada ee Wadaniga ah si rasmi ah loogu lammaaniyo barnaamijyada kale ee wasaaradda.<br>• Qoondaynta miisaaniyad lagu kaabayo beeralayda yaryar si sare loogu qaado soosaarka cuntada.<br>• Karaan-dhis loo sameeyo saamilayda barnaamijka oo ku saabsan soosaarka cuntada iyo suuqyada loo iib geeyo.<br>• Sameynta cilmi-baaris lagu ogaanayo waxsoosaarka cuntada ee dalka gudihiisa iyo nafaqeeyayaasha ay ka kooban tahay. |
| **Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta & Daaqa ee DFS** | • **In anfacada xoolaha looga faa'iidaysto Quudinta Dugsiyada**<br>• Kala-shaqaynta WWHTS sidii ay u hirgalin lahayd farsamooyin loogu talaggalay BQD ee bulshada miyiga.<br>• Taageerada karaandhiska saamilayda ee dhinaca ka-qaybgalka bulshada reerguuraaga ah ee QD. |
| **Wasaaradda Arrimaha Bani'aadamnimada iyo Maaraynta Musiibooyinka ee Federaalka** | • **Talo-bixin farsamo oo ku saabsan daryeelka bulshada.**<br>• Garab-ku-siinta WWHTS in ay aqoonsato caruurrta dugsiyada kuwooda ugu nugul.<br>• Hagitaan farsamo oo la siiyo bulshada ay musiibadu saamaysay.<br>• Dejinta siyaasadaha ilaalinta bulshada ee carruurta dugsiyada.<br>• Talo-bixin ku saabsan taageero quudin dugsiyadeed oo loo gaarsiiyo BGD iyo saboolka magaalada. |
| **Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee DFS** | • **Xaqiijinta in BQD lagu daro qorshayaasha horumarinta qaranka.**<br>• Taageeridda karaandhis ku saabsan maaraynta barnaamijka. |
| **Wasaaradda Maaliyadda ee DFS** | • **Hubinta in wasaaradaha uu quseeyo Barnaamijka Quudinta Dugsiyadu ay u qoondeeyaan miisaaniyad gaar ah.** |

| | |
|---|---|
| **Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha ee DFS** | • **In la xoojiyo helitaanka biyo nadiif ah gudaha xarumaha waxbarashada.**<br>• Bixinta talooyin farsamo oo ku aaddan in dugsiyadu yeeshaan habab cunto-karin oo tamarta beeqaamiya.<br>• Talo-bixin ku saabsan sidii loo heli lahaa ilo tamareedyo kale. |
| **Wasaaradda Waxbarashada ee DG** | • **Xiriirinta guud ee wasaaradda ee gudaha dawlad-goboleedka.**<br>• Hubinta habsami-u-socodka qaab-dhismeedyada sharciga ee heer dawlad-goboleed.<br>• Hoggaaminta iyo taageeridda wadashaqayn iyo iskaashi dhinacyo badan leh oo ka qabsooma gudaha DG.<br>• Taageeridda kor-joogtayn iyo tayadhawr dhinacyo badan leh oo ka hirgala dawlad-goboleedka.<br>• Mas'uuliyadda maalgelinta barnaamijka ee heer dawlad-goboleed.<br>• In la taageero horumarinta habraacyada nidaam iyo shaqo ee gudaha dowlad-goboleedka.<br>• Karaandhiska kooxaha farsamada ee gudaha dawlad-goboleedka. |
| **Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee DG** | • **Qoondaynta miisaaniyad loo asteeyo caafimaadka iyo arrimaha nafaqada ee dugsiyada.**<br>• Karaan-dhis ku saabsan Biyaha, Fayadhawrka iyo Nadaafadda (BFN) oo la siiyo saamilayda qaybta ka ah barnaamijka.<br>• In la dejiyo habraacyo nafaqo oo rasmi ah oo loogu talaggalay carruurta dhigata dugsiyada.<br>• Bixinta habraacyo ku saabsan quudinta dugsiyada ee nafaqo-kobcinta, tayadhawrka cuntada iyo tilmaamaha badbaadada ee gudaha dawlad-goboleedka.<br>• In la bixiyo hagitaan farsamo oo ku saabsan diyaarinta liisaska cuntooyinka dugsiyada ee gobolka.<br>• Samaynta habraacyo la xiriira nafaqeeyayaasha yaryar iyo fiitamiinnada kaalmaatigga ah ee heer gobol. |
| **Wasaaradda Beeraha ee dawlad-goboleedka** | • **In barnaamijka quudinta si rasmi ah loogu lammaaniyo barnaamijyada kale ee wasaaradda.**<br>• Qoondaynta miisaaniyad lagu kaabayo beeralayda yaryar si sare loogu qaado soosaarka cuntada.<br>• Karaan-dhis loo sameeyo saamilayda barnaamijka oo ku saabsan soosaarka cuntada iyo suuqyada loo iib geeyo.<br>• Bixinta talooyin ku aaddan kaydinta, badqabka iyo adeegga cuntada. |

| | |
|---|---|
| | ● Sameynta cilmi-baaris lagu ogaanayo waxsoosaarka cuntada ee dalka gudihiisa iyo nafaqada ay ka kooban tahay. |
| **Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee DG** | ● **In barnaamijka quudinta lagu daro barnaamijyada kale ee wasaaradda.**<br>● Karaandhis ku saabsan maareynta barnaamijka. |
| **BCA, UNICEF, ICW, Bangiga Adduunka, iwm.** | ● **Taageero maaliyadeed oo lagu kaabo hawlaha Quudinta Dugsiyada.**<br>● Qiimaynta iyo kormeerka Barnaamijka.<br>● Taageero farsamo oo lagu kobcinayo karaanka hay'adaha dowladda iyo shaqaalaha ka hawgala.<br>● Taageero dhinaca maamulka ah.<br>● Bixinta khibrado farsamo. |
| **Ururrada Bulshada Rayidka ah/ xarumaha cilmibaarista** | ● **Taageero maaliyadeed oo la siiyo wasaaradaha.**<br>● Taageeridda kormeerka, qiimaynta iyo cilmibaarista.<br>● Bixinta taageero farsamo oo la xiriirta hirgelinta barnaamijka.<br>● Bixinta taageero khibrado farsamo.<br>● Taageero dhinaca karaandhiska farsamada ah.<br>● Gacan ka gaysiga dhanka horumarinta habraacyada. |
| **Dugsiyada** | ● **Abaabulka Waalidiinta.**<br>● Hirgelinta barnaamijka si loo hubiyo tayada iyo badbaadada cuntada la siiyo ardayda.<br>● Dhawridda iyo kaydinta diiwaannada.<br>● Maareynta hannaanka lagu xusho cunto-bixiyayaasha. |
| **Guddiga Waalidiinta ee Dugsiga/ Guddiga waxbarashada Bulshada** | ● **Kor-joogtaynta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada.**<br>● Kormeerka Barnaamijka Quudinta Dugsiyada.<br>● In laga taageero barnaamijka dhinaca shidaalka cunto-karinta iyo agabyada kale ee lama-huraanka ah. |

### 4.3. Cilmi-baarista, Kormeerka, Qiimeynta iyo Barashada

#### 4.3.1 Hordhac

Nidaamyada cilmi-baarista, kormeerka, qiimeynta iyo barashadu waa kuwo lagama maarmaan u ah go'aan qaadashada ku salaysan xog-wareysiga khubarada, barashada, iyo isla-xisaabtanka si loo wanaajiyo waxtarka barnaamijka. Hirgelinta barnaamijka waa in ay noqotaa mid waxku'ool ah, hufan oo tayo sare ku tilmaaman. Sidaas darteed, waxaa si joogto ah loo sameyn doonaa kormeer ku saabsan hirgelinta hawlaha, si loo hubiyo hannaanka la raacay uu yahay mid sax ah oo uu barbar socdo geeddisocodka maamulka laga soo bilaabo soo iibsiga cuntada ama isticmaalka boonooyinka cuntada lagu qaato, ilaa cuntada la kariyey ardayda dugsiga loo qeybinayo.

Soo saarista caddaymo muujinaya 'waxa si wanaagsan u shaqeynaya iyo waxa aan shaqeyneynin' waxay taageereysaa go'aan-qaadashada iyo hagaajinta hirgelinta barnaamijka. Wadaagista caddaymahaasi waxay sidoo kale ka qayb qaadan doontaa kobcinta aqoonta caalamiga ah iyo sumcadda BQD si wax looga beddelo loona horumariyo. Caqabadaha ugu waaweyn ee barnaamijku wajihi karo waxaa ka mid noqon kara: In isku mar barnaamijka quudinta dugsiyada la hirgeliyo lana ballaariyo baaxadda uu daboolayo. Mudnaanta aaggaan waa in la xoojiyo kormeerka joogtada ah iyo teknoolojiyadda ku saleysan, qiimeynta iyo nidaamyada warbixinta hirgelinta BQD, lana soo saaro caddaymo kooban oo waxku'ool ah oo lagu hago go'aan-qaadashada, dib-u-eegista iyo horumarinta geeddisocodka siyaasadda.

#### 4.3.2 Bayaanka Siyaasadda

In kor loo qaado habka bixinta Barnaamijka quudinta dugsiyada iyada oo lagu saleynayo lahaanshaha qaranka, kormeer iyo qiimeyn joogto ah oo waxku'ool ah, iyo ka warbixinta hirgelinta Barnaamijka Quudinta Dugsiyada.

#### 4.3.3 istaraatijiyadaha

1) In la dejiyo tilmaamayaal waxbqabad oo isku-dhafan oo ku saabsan kormeerka iyo qiimeynta Quudinta Dugsiyada.
2) Xoojinta kormeerka guud, qiimeynta iyo habka warbixinta iyadoo la unkayo hannaan midaysan oo la raaco.
3) In loo boorriyo lana hirgeliyo nidaamyada dhijitaalka ah ee muhiimka u ah maareynta xogta BQD
4) In la adkeeyo xiriirka iyo iskaashiga cilmi-baarista QD ee hay'adaha cilmi-baarista iyo shakhsiyaadka kale.
5) In la dhiso lana xoojiyo hannaan jawaabcelineed oo ku aaddan wargelinta/xog la wadaagidda saamileyda si kor loogu qaado isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta
6) In la abuuro xog asaas u ah nafaqada oo ku saabsan carruurta dhigata dugsiyada Soomaaliya.
7) In la dhiirrigeliyo lana dhaqangeliyo kormeer joogto ah oo ku saabsan waxqabadka QD oo ay ka qayb qaadanayaan saamileyda heer degaan ah.
8) In la adeegsado waddoyin badan oo lagu faafinayo macluumaadka si ay ugu habboonaato daneeyayaal kala duwan, oo ay ku jiraan kooxaha aan waxna akhrin waxna qorin.
9) In la xoojiyo waayo-aragnimada/casharrada laga bartay iyo lahaanshaha bulsho ee BQD
10) La shaqeynta hay'aadaha ay siyaasaddu khuseyso si loo sameeyo cilmi-baaris ku saabsan hirgelinta BQD si ay siyaasadda u jihayso islamarkaana loo dhiirrigeliyo habab waxku'ool ah oo la dhaqangelin karo.

### 4.4 Dhaqangelinta Siyaasadda iyo Dib-u-eegista

Hirgelinta siyaasaddan waxay gacan ka geysan doontaa horumarinta natiijada waxbarashada, caafimaadka iyo nafaqada ee carruurta dhigata dugsiyada, taasoo muhiim u ah korriimada karaanka aadanaha iyo kobaca dhaqaalaha dalka. Ujeeddada siyaasaddu waxay tahay in la horumariyo adeeg-bixinta barnaamijka quudinta dugsiyada ee isku-dhafan taasoo si weyn uga qeyb qaadan doonta yaraynta gaajada ay wajahaan carruurta dugsiyadu, dhanka kalana kor u qaadi doonta tayada waxbarashada.

Waxay sidoo kale, dhiirrigelin doontaa kordhinta isdiiwaangelinta ardayda, imaanshaha dugsiga, joogtaynta iyo gebagabaynta waxbarashada. Sidoo kale, waxay bulaalin doontaa dhaqaalaha gudaha iyadoo la horumarinayo dakhliga beeraleyda yaryar iyo ganacsatada degaanka, isla markaana kordhin doonta helitaanka cuntooyin cusub oo kala-jaad ah oo lagu daro liisaska cuntada dugsiyada. Intaa waxaa dheer, waxay sare u qaadi doontaa aqoonta iyo xirfadaha carruurta iyo waalidiinta ee ku saabsan nadaafadda iyo caadooyinka habboon ee cuntada.

Si kastaba ha ahaatee, in hirgelinta siyaasadda Quudinta Dugsiyadu guulaysato waxay ku xiran tahay helitaanka iskuduwid dhinacyo badan leh, qoondayn kheyraad oo ku filan, horumarinta iyo adeegsiga habraacyo ku habboon, is-gaarsiin iyo abaabul bulsho oo kor u qaada lahaanshaha iyo kordhinta qoondaynta kheyraadka, karaandhis iyo kormeer wax-ku-ool ah; iyo qiimeyn iyo barasho joogto ah.

Siyaasaddan waa dukumeenti magguuraan ah oo u furan in dib-u-eegis lagu sameeyo markii loo baahdo iyada oo lagu jaan-goynayo isbeddellada dunida, gobolka iyo qaranka. Sidoo kale, dib-u-eegis qaran ayaa lagu samayn doonaa sannadka shanaad ee hirgelinta siyaasadda. Horumarinta barnaamijka quudinta dugsiyada waa qodob lamahuraan u ah korriimada karaanka aadanaha iyo kobaca dhaqaalaha. Waana qayb muhiim ah oo ka mid ah hortabinnada qaranka si loo gaaro himilada 2030, oo ay ku jirto ballaarinta helitaanka waxbarashada hoose ee carruurta da'da dugsiga ku jirta guud ahaan dalka.

Dowladda Soomaaliya waxay sidoo kale hiigsanaysaa in ay hoos u dhigto gaajada carruurta iyadoo maalgelinaysa quudinta dugsiyada oo la caddeeyay inay leedahay faa'iido dhaqaale oo aad u weyn. Daraasadaha qaarkood ayaa muujinaya in maalgashi kasta oo 1 doollar ah oo lagu bixiyo Quudinta Dugsiyada uu soo celin karo faa'iido u dhaxaysa 7 ilaa 35 doollar. Marka laga soo tago in uu yareeyo gaajada muddada gaaban kana qayb qaato horumarinta caafimaadka ardayda iyo helitaankooda fursado waxbarasho, mustaqbalka fog wuxuu barnaamijku si togan uga qayb qaadan karaa xoojinta korriimada karaanka aadanaha ee qaranka, isagoo u maraya sare-u-qaadidda heerka tacliinta ee dadweynaha.

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ayaa mas'uul ka ah hoggaaminta iyo isku-dubbaridka hirgelinta siyaasaddan. Guul laga gaaro hirgelinta BQD waxay u baahan tahay ka-qaybgalka saamiley dhinacyo badan iyo wasaarado kala duwan oo gacan ka gaysta, iyo sidoo kale, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, bahwadaagta horumarinta, ururrada bulshada rayidka ah, bulshada degaanka, iyo dheefsadayaasha barnaamijka qudhooda.

Barnaamijka quudinta dugsiyada waa mid daadagsan ilaa heer degmo iyo dugsi, iyada oo lala kaashanayo wasaaradaha dawladda federaalka ah sida; Beeraha, Kalluumaysiga iyo Dhaqaalaha

Buluugga ah, Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, Xannaanada Xoolaha, Maaliyadda, Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, iyo Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Waxaa la filayaa iyadoo laga faa'iidaysanayo aragti-wadaag dhinacyo badan leh iyo mas'uuliyiinta heerka sare ah ee barnaamijka hoggaaminaya, in siyaasaddu u horseeddo dhammaan dhinacyada kala duwan ee ay khusayso in ay la yimaadaan ka-go'naansho iyo taageero mug leh ee ku aaddan barnaamijka quudinta dugsiyada. Siyaasaddu waxay dib u xoojinaysaa ballanqaadka Dowladda Soomaaliya ee ku aaddan horumarinta waxbarasho tayo leh oo loo dhan yahay, taasoo udub-dhexaad u ah dadaallada horumarineed ee mustaqbalka fog iyo kobaca dalka.

## TIXRAACYADA LA KAASHADAY


African Union Development Agency-NEPAD. 2020. School Feeding Handbook: Home Grown School Feeding: Lessons from Botswana, Ghana And Nigeria.

African Union (2018). Sustainable School Feeding Across the African Union.

African Union Commission (2021). African Union Biennial Report on Home-Grown School Feeding (2019-2020)

Drake, L. 2016. Global School Feeding Sourcebook Lessons from 14 countries. Imperial College Press.

FAO and WFP, 2018. Home-Grown School Feeding Resource Framework

Federal Government of Somalia; 2017. Education Sector Strategic Plan 2018-2020: Ministry of Education, Culture and Higher Education.

UNESCO; 2004. FRESH Tools for Effective School Health. Guidelines to Develop and Implement School Feeding Programmes that improve Education http://www.unesco.org/education/fresh

ISSA, M., Willy Muturi, W and Samantar, M, S. 2019. Influence of School Feeding Programme on Performance of Public Primary Schools in Bossaso District Bari Region, Puntland – Somalia- International Journal of Advanced Research (IJAR).

FAO & WFP. 2018. Home-Grown School Feeding. Resource Framework. Technical Document. Rom

Food and Agriculture Organization of the United Nations Rome, 2020. School-based food and nutrition education – A white paper on the current state, principles, challenges, and recommendations for low- and middle-income countries. Rome. https://doi.org/10.4060/cb2064en

Food security and analysis unit, Somalia. 2021. Technical release.

Federal Republic of Somalia. 2012. Provisional Constitution adopted August 1, 2012, Mogadishu, Somalia.

Government of Ghana (2015). Draft National School Feeding Policy. Ministry of Education.

Ministry of Health and Human Services Federal Republic of Somalia, 2020. Somalia Nutrition Strategy 2020 -2025.

Ministry of Labour and Social Affairs, March 2019. Somalia Social Protection Policy.

Ministry of Planning, Economic Development. 2019. Somalia 9th National Development Plan 2020 - 2024.

FSNAU (2009). National Micronutrient and Anthropometric Nutrition Survey Somalia

Office of the Prime Minister and World Food Programme (2020). Somali Fill the Nutrient Gap and Cost of the Diet Assessment. Mogadishu, Somalia.

Republic of Kenya, 2017. National School Feeding and Nutrition Strategy 2017–2022. Ministry of Education, Ministry of Health and Ministry of Agriculture, Livestock and Fisheries.

UNICEF 2016. Situation Analysis of Children in Somalia.

United Nations Development Programme Regional Bureau for Africa (RBA). 2012. Africa Human Development Report 2012. Towards a Food Secure Future. Web: https://unp.un.org , www.undp.org/africa and www.afhdr.or

WFP; 2020. A chance for every schoolchild: Partnering to scale up School Health and Nutrition for Human Capital. Rome, Italy www.wfp.org/school-feeding
WFP 2019. School Feeding In 2018. Beyond the Annual Performance Report 2018 Series.
WFP; 2017. How School Feeding Contribute to the Sustainable Development Goals: A Collection of Evidence.
WFP; 2013. School Feeding Policy: Promoting innovation to achieve national ownership.
WFP; 2016. Smart School Feeding Nutrition-Sensitive National Programmes in Latin America and the Caribbean
A Review of 16 Countries.
World Bank Group Education Strategy 2020. Learning for All: Investing in People's Knowledge and Skills to Promote Development.
World Bank. 2018. World Development Report 2018: Learning to Realize Education's Promise. Washington, DC: World Bank.
World Bank. 2012. System approach for better education results (SABER); working paper No 3, 2012. What matters most for school health and School Feeding, a framework paper series.
World Bank 2018. Re-Imagining School Feeding: A High-Return Investment in Human Capital Economies.